# Cibaado yar iyo Ajar badan
















CIBAADO YAR IYO AJAR BADAN

Cibaado Yar iyo ajar badan buug muhiim u ah Qofkasta oo muslima,

Qofkii sheekh ahna baraarujin iyo xasuusin u noqonaya

Kii arday ahna gacan-qabasho iyo wado uu maro u noqonayo

Buuuggan waxii laxariiro sida qalad aad ku aragtay, ama bogaadin, Ama mahadnaq, Ama cabasho, Ama fikir iyo aragti kale ah iigu soo Gudbi WHATSAPPKeyga uu numberkiisa Yahay 0618267690. Mahadsanid cafiimaad Ku aqri.

Hadii aad buuggan pdf ku aqrineyso waxaa kugula talin lahaa in aad soo daabacado si uu kuugu sahlanaado In maalinkasta aad agtaada Kasoo qabsado, indhahana guugu xanuusan, Maadaama buugaagta ubadanyihiin kuwa inta la aqriyo fikir uun lagaqaado laakiin buugggan waa kaduwanyahahay Buugaagtaas waa buug in lasoo kalabixiyo Oo cibaadaadka kuxusan si maalinle ah loo Sameeyo ubaahan Weeye.

TUSMADA BUUGGA

Mahanaq—------------------------------------------------------------------------------4
Hordhaca buugga—-----------------------------------------------------------------------5
cutubka koowaad:adkaar guud (mudlaq)—---------------------------------------6
Cutubka labaad:adkaar gaar ah(muqayad)-----------------------------------21
Cutubka Seddexaad:Cibaado ficli ah —-----------------------------------26
Cutubka afaraad:qodobo muhiim ah—------------------------------------45
Kuxasilidda salaadda—--------------------------- -—---------------------45
Ducada—----------------------------------------------------------------48
Sadaqada—-------------------------------------------------------58

MMAHADNAQ

Waxaan umahadnaqayaa allaah subxaanahu watacaalaa oo ii ogolaaday in aan qoro buug yarahaan aan ku iftiimindoono dhowr waddo oo kamid ah wadooyinka qeyrka, alle kadib waxaan umahadnaqayaa waalidiintay iyo macalimiinteydii diinta, iyo cidwalba oo nolosheyda maalin uun waxkusoo gordhisay,

Intaas kadib waxaan umahadnaqayaa qofwalba oo buuggan aqriyo Ama dad sii gaarsiiyo si uu uga faaideysto dhamaan mahadsinidiim.

Hordhaca buugga

Buugggan waa buug kagooban 4 cutub oo kala duwan waxaana kaga hadli doonaa dariiqooyin badan oo kheyr ah.

Bal soo xisaabi camalkaagii wanaagsanaa ee maanta mabadanyahay mise waa yaryahay, waxyar fikir oo aqrinta jooji, hadii uu gaarayo 10 waad roontahay, soo xisaab camal kasta oo wanaag ah oo maanta sameysay,

Waxay ilatahay inuu yaryahay, hadaba si aad ajar badan ushaqeysato buuggan adiga ayaan kuugu talagay ee kuraaxeyso aqrintiisa, kunadedaal in aad jadwal Maalinle ah aad kadhigato kheryka kuxusan oo hakadhigin mid intaa aqrido aad kasii gudubto ee kadhig mid noloshaada maalinkasta kaqaato qeyb kamida.

Waxaan rajeynaa in aad buuggan dhameydoonto, hadii aad dhameyso kunadhaqanto waxaan kaa codsanayaa saaxiibkaaga kuugu dhowna in aad udaabici doonto si uu uga faaideysto.

Buugggan waxaan ka ilaaliyay intii macquul ah fikirkeyga ama fikir dadkale waxaana kudedaalay waxwaliba oo aan sheegayo in Aan daliilkeeda raaciyo.

Waxkasta oo halkaan kuxusan oo cibaado ah waxaad ku arkeysaa daliilkeeda iyo ayadii oo isla socdo, si quluubta dadka ugu xasisho oo si yaqiina ay ugu qaadato hadalka kuqoran buuggan, maadaama uusan jirin Muslim kuqanceynin hadalkii rasuulka mise kii alle.

Cutubada hore oo adkaaraha kuqoranyihiin waxaan kudedaalay in aan afsomali kuturjumo iyo in ducadii oo carabi ah aan kuqoro farta soonaaliga si uu qofkii uu carabiga dhibayo uu u aqriyo asaga oo ku aqrinayo farta hooyo.

## Cutubka 1aad :adkaar fadli badan.

Ugu horeyn ducada waxay u qeybsantaa labo qeybood oo waaweyn oo kala ah:

B: duco baryo iyo talbasho ah,  oo allaah subxaanahu watacaalaa laweydiisanayo fadligiisa, qof walibana katalbanayo waxuu doonayo.

T:duco cibaado ah,sida soonka,salaadda,tasbiixda iwm,  oo iyadana usii kala jabto qowli(afka laga sameynayo) iyo ficli(ficil ahaan loo sameynayo). noocaan cibaadada ah waa mida aan maalinkasta aan sameyno oo allaah subxaanahu watacaalaa uu nagu waajib yeelay qaarna uu inoo suneeyay  si aan   anaga si khiyaarkeena ah ula imaano,

Balse buuggan insha Allah inta badan waxaynu kaga hadli doonaa mida dambe ee qodobka T  kuxusan, dhanka kalena ma ilaawi doono nooca kale oo ayadana muhiim ah,

labadoodaba intii uu allaah subxaanahu watacaalaa iiga saqiro sidookalena aan ka aqaan uunbaa ka xusidoonaa.

***Adkaar***

Horta waa in aan halmid isla ogaano oo ah cibaadada waa suno iyo waajib, kuwa waajibka ah waxaa kamida salaadda, soonka, iwm. Iyo kuwo sunno ah, kuwa waajibka ah kama hadli doono sida salaada, soonka,iyo  sakada,  sababtuna waa  qof jaahil ka ah oo yar, dhowr kitaab oo laga qoray oo xitaa afsomali leh iyo culimadeena allaah haka abaalmariyee oo inta badan baraarujiyay, juhdi iyo dedaal badana kubixiyay oo dhabarka uxirtay,

Adkaaraha waxa ay isugu jiraan kuwa goorkasta lala imaankaro(mudlaq) iyo kuwa waqtiyo gaar ah lala yimaado (muqayad),  labadaba intii aan karikaro ayaakasheegi doonaa, Kuwii mudlaq ahna waan cadeey doonaa,  sidookalena Kuwii  muqayad ah waan sheegi doonaa, si loo kala ogaado.

Adkaarta iyo tasaabiixda ajar badana ayaa kusugan waxaana kamida in uu nabigu dhahay carrabkaagu yuuna kamarnaanin in uu kaqoyanaado dikriga alle.
cibaadada waa sirta lagu bedbaado qiyaamaha aduunkana lagu guuleysto Hal cadow oogeliya ayaynu leenahay oo ah sheydaan naga hordaagan gudashada acmaasha wanaagsan oo Marar aad ubadan naseejiyo alle ayaana kadembi dhaaf talbeynaa
Balse dikriga iyo tasbiixda ugu horeyso ee aan qaadaneyno waa tanaa:

1: قال رسول الله صلى الله عليه وسلم: من قال: سبحان الله وبحمده في يوم مائة مرة حطت خطاياه وإن كان مثل زبد البحر

Nabiga salallaahu calayhi wasalam waxa uu yiri qofkii dhahaa subxaana laahi wabixamdihi maalinkii boqol mar waxa uu allaah ka tirayaa ama ka masaxayaa dembiyadiisa haba la ekaadaan xumbada ama uburta badda,

**Macnaha oo gooban**

Nabiga nabadgelyo iyo naxariis alle dushiisa hayeelee waxuu yiri qofkii yiraahdo subxaana laahi wabixamdihi maalinkii boqol mar ogowna Macnaha subxaan-I aah waa alle ayaa xumaan oo dhan kanasahayaa ama kadhahirayaa, Macnaha wabixamdihine waa alle ayaan umahadcelinayaa, jumalada oo iskuxerana waa alle ayaa xumaan oo dhan kadhahiran anigoo kudaraya mahadnaq aan umahad celinayo(nimacada isiiyay uga mahadcelinayo sida caafimaaaka, islaanimada….) halahaas hadii aad tiraahdo waxaa lagaa dhaqayaa dembigaaga, tirobadni inta uu kaqabo haba la ekaado xumbada badda e,

**Mas'alo muhiim ah**

Dembiyada laguugu dhaafayo adkaarta sida tasbiixdan iyo ducooyinka kale ee soo socda ma waxa ay yihiin dhamaan qofka bani'aadamka ah waxii dembi ah ee uu samyeeyay? Culimadu waxay leeyihiin waa dembiyada saqaa'irta ah yacni dembiyada yaryar, laakiin dembiyada waaweyn waxay ubaahanyihiin towbo keen iyo in lala yimaado dhamaan sharuudaha towbada oo insha allaah buuggan kusheegi doono.

Markaa macnaha waxa uu noqonayaa qofkii yiraahdo subxaana laahi wabixamdihi boqol mar maalinkii waxa uu allaah udhaafi doonaa demiyadiisa yaryar, dembiyadaas yaryar waa kuwa badanaa sida maalinlaha ah inooga dhaca, anagoo dareensan ama anagoo dareensaneyn, anagoo kaftameyno iyo anagoo xanaaqsan ba,

Qofka dembiyada waaweyn wuu dareemikaraa inta badan, laakiin kuwo yaryar ayaa jiro oo caado unoqday dadka, carabkoodana uu laqabsaday, iyo kuwo waaweyn oo dadka caado unoqday labadaba wey jiraan, laakiin kuwo yaryar tasbiixdan iyo kuwa lamidka ah ayuu alle kucafiyaa, kuwa waaweyna towbo.

sida xadiiska tilmaamayo dembiyada waa lagu dhaafaa adkaartan, jeer ay dembiyadaas tiro badni kaqabaan oo ay la ekyihiin xumbada badda ama uburta badda, uburta badda waa danaa bal fiiri



Hirka ama mowjada badda ayaa sameeya markaa ayuu isdul fuul-fuulaa,



Markaa nabiga waxa uu tusaaleynayaa dembiyada yaryar ee qofka maalinkasta kadhaca asagoo kaftamaya, ciyaaraya,dhamaan ficilada dembiga ah ee yaryar xitaa hadii ay gaaraan badda xumbadeeda tiro badnidooda in loo dhaafayo haduu digrigaa yar la yimaado ee halka daqiiqo kayar qaadanaya. Markaa maalinkasto jadwal hakuu ahaado in aad tiraahdo labadaan kelmad ee subaaxana laahi wabixamdihi maxayelay maalin ay

dembiyo naga dhicin weyartahay ama mabajirto balse kelimaadkaas yar ayaa laguugu dhaafayaa.

2:عن أَبِي هُرَيْرَةَ رَضِيَ اللَّهُ عَنْهُ أَنَّ رَسُولَ اللَّهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ قَالَ : ( مَنْ قَالَ لَا إِلَهَ إِلَّا اللَّهُ وَحْدَهُ لَا شَرِيكَ لَهُ ، لَهُ الْمُلْكُ وَلَهُ الْحَمْدُ وَهُوَ عَلَى كُلِّ شَيْءٍ قَدِيرٌ ، فِي يَوْمٍ مِائَةَ مَرَّةٍ ؛ كَانَتْ لَهُ عَدْلَ عَشْرِ رِقَابٍ ، وَكُتِبَ لَهُ مِائَةُ حَسَنَةٍ ، وَمُحِيَتْ عَنْهُ مِائَةُ سَيِّئَةٍ ، وَكَانَتْ لَهُ حِرْزًا مِنْ الشَّيْطَانِ يَوْمَهُ ذَلِكَ حَتَّى يُمْسِيَ ، وَلَمْ يَأْتِ أَحَدٌ بِأَفْضَلَ مِمَّا جَاءَ ، إِلَّا رَجُلٌ عَمِلَ أَكْثَرَ مِنْهُ ) .

Macnaha Xadiiska waa nabiga waxa uu yiri qofkii dhaha: (laa ilaaha ila-llaahu waxdahu laa Shariika lahu, lahul mulku walahul xamdu wahuwa calaa kulli shey'in qadiir) maalintii qofkii yiraahdo intaas boqol mar, waxa uu lamidyahay asagoo 10 qof xoreeyay, waxaana loo qorayaa boqol xasanaat ah ama ajar, waxaana laga dirayaa boqol dembi, subaxtaas uu aqriyay adkaartaan sheydaan waa laga xijaabayaa ilaa uu galabtii kagaaro oo uu kagalabeysanayo, maalinta qiyaamane qof kafadli badan oo imaanayo majiro ilaa qof aqriyay inta uu aqriyay in kabadan maahane,

**Mcnaha oo gooban**

Nabiga nabadgelyo iyo naxariis alle dushiisa hayeelee waxuu yiri sida uu abuu hureyre kawarinayo qofkii yiraahdo ilaah xaq lagu caabudo majiro allaah mooye, allaahaas oo geligiis ah cid lala caabudaane aynaan jirin, allaahaas waxaa usugan boqortooyada(maamulka cirka iyo dhulka), waxaa sidookalena usugan mahad dhameystiran oo dhamaad laheyn, allaahaas waa kan wax waliba awoodo, hadii aad intaas tiraahdo ogowna afcarabi ayaad kuleedahay hadii ay farta carabiga kudhibeysana waanigaa soomaali kuugu qoray qeybta adkaarta ah ee lagu mudanayo 5 darajo oo muhiimada ay leeyihiin hadii aan ogaan laheynay aanan maalina nadhaafin leyn, 5 taas darajo waa:

1: 10 ama toban qof adigoo xoreeyay ayaa lamidahay nabigane waxa uu axaadiis kale kusheegay in qofka xoreeya hal qof uu allaah xibnihiisa uu naarta ka xoreeynayo, markaa hadii aad adkaartan aqriso si ikhlaas iyo qalbi ah insha allaah waxaa lamidahay adigoo hal qof iskadaaye 10 qof xoreeyay ajarkeedane waxuu kuugelayaa keydka aakhiro.

2: boqol xasanaad ama ajar ayaa laguu qorayaa oo aad sifudud aad kushaqeysaday.

3: boqol dembi ayaa lagaa tirayaa oo maalinta qiyaame lagayaabe hadaa lagaa tirilaheyn dardeed in laguu cadaabi lahaa(alle ayaa naar kamagan galnaye)
4: maalinkaas oo dhan sheydaan isma arkeysaan oo waa kaa xijaabanyahay ilaa aad subixii aad aqrisay galabkiisa lagaaro. Hadii aad galabtii aqridane ilaa subixii lagaaro sidookale.
5: qof kaa ajar badan majiro ilaa qof inta aad aqriday kabadan qariyay mooyaane.

**Mas'alo muhiim ah**

Si aynaan qaladaad faham ah u dhicin waa in ishkaal walba oo qofka maskaxdiisa kusoo dhaco intii aan isleeyahay qofkii fekeraa wuu isweydii karaa aan halkaan kuxaliyaa waa inta aan xasuusakaro. Tusaale qofkii adkaartaan kufekeraa waxa uu su'aal iskaweydiinaa qodobka ugu dambeeya ee ah qof kaa fadli badan majiro ama ma imaanayo maalinta qiyaame, se waa in aan kajawaabno qofka adkaartaan aqriyaa miyuu kafadli badnaanayaa qof soomay, ama jihaaday, ama xajiyay?
Jawaabtu waa maya.

Markaa maxaa laga wadaa qof kaafadli badan majiro maalinta qiyaame?
Jawaabtu waa: Horta baababka qayrka way badanyihiin, baabkaas waxaa kamida baabu jihaad, baabu siyaam ama soon, baabu sadaqa, baabu cadli, baabu dikri,baabu cilmi, markaa qof ayaa jiriKara uga fadli badan qofkale baab gooni ah laakiin labada qof si guud waxaa laga yaabaa inuu fadli badanyahay qofkii baabka gooniga ah looga fadli badnaaday, tusaale ayaa wax lagu fahmaa ee bal tusaalahan udhegraarici,

Tusaale waxaa laga yaabaa in imaamu shaafici uu saxaabada qaar kaga fadli badnaado baab gooni ah Lakin Siguud marka layiraahdo imaamu shaafici laga fadli badnaanayo, tusaale baabu cilmi markii lajoogo saxaabada qaar oo ree baadiyo ah ayaa jiray, oo mar ay magaalada imaadaan nabiga lakulmi jiray hal xadiis inta ay maqlaane baadiyahooda isaga laabanayay, markaa marka lafiiriyo imaamu shaafici oo kumanaan xadiis gor kaxafidsanaa sidokale gor kahayay aqwaasha saxaabada iyo fiqhigii culimadakale, keebaa kufadli badnaanayo baabu cilmi saxaabigaas iyo imaamu shaafici, shaki kuma jiro imaamu shaafici, laakiin Siguud midkee ayaa fadli badan? waxaa fadli badan saxaabiga maxaayelay aragtida nabiga uu arkay ayaa wax loodhigo laheyn,
Markaa saxaabigii iyo imaamu shaafici yaa kudheereeya dhanka cilmiga?waxaa kudheereeyo imaamu shaafici, laakiin labadooda si guud midkee fadli badan? Saxaabiga, maxaayeelay saxaabada waa dadka umadda ugu kheyr badan, qarnigoodiina qarniyada ugu kheyr badan, markaa dikrigaam

hadaa aqriso qof dikri aqriyay oo kaaga fadli badan baabu dikri majiro, fadliga tirada badan ee kusoo aroorayna waa mid lagu mudanayo

**Mas'alo kale**

Maadama dikrigaas boqol mar in lagu celiyo ubaahanyahay In hal fadhi lagu aqriyo waajib miyaa?
Maya in aad adkaartaan hal fadhi kulatimaado oo aad iskuxirto waajib maaha waad unasakartaa, daqiiqado udhaxeysiikartaa, laakiin sida wanaagsan waa in laxariiriyo,
Lakin waqti maba ubaahno oo waa adkaar fadli badan balse kaa qaadakarto waqti kayar 10 daqiiqo waliba aad uga sii yar.

3:عن جابرٍ -رضي الله تعالى عنه-: أنَّ النبي ﷺ قال: مَن قال:"سبحان الله العظيم وبحمده" غُرست له نخلةٌ في الجنة

Nabiga nabadgelyo iyo naxariis alle dushiisa hayeelee waxuu yiri qofkii yiraahdo subxaana laahil cadiim wabixamdihi janada ayaa geed timireed loogu talaalayaa,

**Mcnaha oo gooban**

Nabiga nabadgelyo iyo naxariis alle dushiisa hayeelee waxa uu halkaane kuyiri qofkii dhaha allaha weyn ayaa xumaan kadhahirayaa anigoo kudaray mahadnaqiisa, allaah janada ayuu geed timireed ugu beerayaa.

Hada eeg waa halmar oo qura oo tiraahdo subxaana laahil cadiim wabixamdihi ayuu alle janada geed kuugu beerayaa, bal qiyaas maanta ama caawa imisa geed ayaad beerakartaa, meesha waa meel loo tartamo ee imisa timir ayaad kubeerakartaa ilaa iyo caawa, ileen hadalku been maaha oo waxa uu afkiisa kasoo fulayaa khayru Khalqi lahaa ama kii san kuneeflaha oo dhan ugu qeyr badnaa,
Markaa su'aasha waxay tahay imisa ayaad beerakartaa ilaa 10ka saac ee kusoo xigto kedib aqrinta boggaan.

**F.G**. waxaad kala xasuusadaa adkaartii hore ee buugga kubilownay ee number 1 aheyd, iyo midaan yara wey is shabahaan, midii hore waa subxaana laahi wabixamdihi oo dembiyada lagu tirtirayay jeer ay la ekaadaan xumbada badda, laakiin adkaartaan kale ee hada kahadleyno ee janada geed timireedka laguugu talaalayo waa subxaana laahil cadiim wabixamdihi, mida dambe waxaa lasocdo xarafka cadiim.

4:عن أبي هريرة  قال: قال رسول الله ﷺ: كلمتان خفيفتان على اللسان، ثقيلتان في الميزان، حبيبتان إلى الرحمن: سبحان الله وبحمده، سبحان الله العظيم

Nabiga nabadgelyo iyo naxariis alle dushiisa hayeelee waxa uu leeyahay: labo kelimo oo carabka kufudud, Kuna culus miisaanka, loogu jecelyahay yahay alle xagiisa: subxaana laahi wabixamdihi subxaana laahil cadiim.

**Macnaha guud**

Nabiga nabadgelyo iyo naxariis alle dushiisa hayeelee waxuu yiri waxaa jiro labo kelimo oo carabka in looga dhawaaqaahi fudutahay ama sahlantahay, miisaanka qiyaamaha marka acmaasha lamiisaamayana culus, oo kuu cusleynayo camalkaaga wanaagsan, si uu uga miisaan bado kii xumaa, allaah agtiisana aad looga jecelyahay kelmadahaas, labadaas kalimo ee sifaat kaas leh waa: subxaana laahi wabixamdihi subxaana laahil cadiim(alle ayaan xumaan kadhahirayaa anigoo kudaraya mahadnaqiisa, allaah ayaa xumaan kadhahirayaa allaaha weyn ee cid kaweyni aysan jirin, Runtii Waa kelmado aad ufudud hayeeshee cid latimaadana yartahay,

Lakin xagee ayay ku fudud yihiin? Carabka, xagee ayayna kuculusyihiin  miisaanka, Sidaas daraadeed ayaa waxaa tilaama-maahaas iyo sifooyinkaas loo siiyay qiimaha ay leeyihiin labadaas kelimo, balse alle hanoo kaso in aan daa'imno.

5:عن سعد بن أبي وقاص -رضي الله عنه - قال: كنا عند رسول الله ﷺ فقال: أيعجز أحدكم أن يكسب في كل يوم ألف حسنة؟ فسأله سائل من جلسائه: كيف يكسب ألف حسنة؟ قال: يسبح مئة تسبيحة فيكتب له ألف حسنة، أو يحط عنه ألف خطيئة [رواه مسلم

Sacad bin abii waqaas waxuu yiri: maalin maalmaha kamida anagoo agfadhino rasuulka salallaahu calayhi wasalam ayuu dhahay: miyuu kacaajisayaa qof idinkamida in uu soo shaqeysto maalinkii 1000(kun) xanasaad ah? Markaas buu weydiiyay saxaabi kamida saxaabada  nala fadhiday sidee ayuu qof usoo shaqeysanayaa kun xasanaad ah? Markaa buu yiri nabiga: wuu tasbiixsanayaa boqol jeer markaa ayaa loo qorayaa kun xanasaad ama ajar ah ama laga tirayaa kun dembi.

**Macnaha oo gooban**

Saxaabiga waxa uu dhahay maalin ay nabiga iyo saxaabadiisa isla fadhiyeen,markaa ayuu nabiga dhahay: miyuu qof idinka mida kacaajisayaa inuu soo shaqeysto kun xasanaad? Markaa baa lagu yiri oo sidee? Markaa buu dhahay boqol mar ayuu tasbiixsanayaa(subxaana laahi dhahayaa) markaas ayaa loo qorayaa boqol ajar ama laga tirayaa boqol dembi,

Markaa hadii aad boqol mar tiraahdo tasbiixdaas waxa aad heysadaa fadliga uu nabiga sheegay ee ah in boqol ajar laguu qoro ama in boqol dembi lagaa tirayo.
**F.G boqol mar ayuu** tasbiixsanayaa waxaa laga wadaa boqol mar ayuu dhahayaa subxaana laahi.
Ayadane kuma dheeraanayo kahadalkeeda oo waxay lamidahay tasaabiixda uu fadliga badan kusoo arooray.

6:فقال لي النبي صلى الله عليه وسلم: يا عبد الله بن قيس، ألا أدلّك على كنزٍ من كنوز الجنة؟ فقلت: بلى يا رسول الله، قال: قل: لاحولَ ولا قوةَ إلا بالله

Cabdulaahi bin qays waxuu leeyahay nabiga salallaahu calayhi wasalam ayaa idhahay Cabdulaahi bin qeysoow miyaanan kutuseynin keyd ama qasnad kamida qasanadaha janada? Markaa baa Haa kudhahay markaas buu nabiga igu yiri dheh laa xowla walaa quwata ilaa billaah,

**Macnaha oo gooban**

**C**abdulaahi ibnu qays oo Caan ku ah naaneysta abii muusaa al ashcari, waxuu yiri nabiga ayaa igu dhahahay cabdulaahi-yow miyaan kutuseynin keyd kamida keydadka ama qasnad kamida qasnadaha janada? markaa ayaa ku iri Haa, suu igu yiri dheh laa xowla walaa quwata ilaa billaah oo ah Somali ahaan: xeelad iyo awood inooma sugnaan in uu allaah nagu garabgalo mooyaane,
Awood inaad leedahay ayaad kaberi-noqoneysaa, sidookale qofka hadii uu xoog waxkugeensokarin cali ayuu isbidaahe caqligii iyo xeelad ayaad kaberinoqoneysaa, oo

waxaad leedahay ilaahayow xoogna malihi xeeladna malihi adiga in aad ilajirto mooyee, waa jumalado fahamkooda guud uu yahay ilaahow adigaa kuu baahanahay.

Waa labo kelimo oo aad ufudud Lakin lagu heleyo qasnad kamida qasnadaha janada.

Sidoo kale waxaa kujiro isdhuldhig iyo kibir iska ilaalin, maxayeelay allaah la'aantiis in aadan waxbo aheyn ayaa qirtay, oo waxbo darikarin, sidaas dardeed howlkasta oo aduunka ah wey kuu fududaaneysaa iyo mida aakhiro, cudurada iyo xanuunada uu allaah dadka ku imtaxaanana waad kabadbaadi, sabbatoo ah allaah dadka waxuu ku imtixaanaa cuduro iyo xanuuno iyo arimo culus oo qoorta loo suro,  hada eeg allaah waxa uu  ii intaas usameynayo maaha ciil ama naceyb uu uqabo dadkaas ee waa in uu tuso in uu allaah kamaarmikareynin  iyo in ay usoo noqdaan, markaa hadii aad qirto xeelad iyo awoodba in aadan laheyn oo allaah si toos ah isagu dhiibto insha allaah imtixaanaadka aduunka iyo kuwa aakhiro waad kuguuleysan, sidaa dardeed labadaan kalimo ee kor kuxusan waa sir ee markasta laasim, qoraxda inta ay soo baxdo yeyna dhicin adigoo dhowr mar kucelcelin.

7:قال رسولُ الله ﷺ: أحبّ الكلام إلى الله أربع: سبحان الله، والحمد لله، ولا إله إلا الله، والله أكبر،لا يضرّك بأيهنَّ بدأت

Rasuulka salallaahu calayhi wasalam waxa uu halkaan kuleeyahy hadalka allaah loogu jecelyahay waa 4 subxaana laahi, wlaxamdulilaah, walaa ilaah ila-llaahu, walaahu akbar.

**Macnaha oo gooban**

Nabiga waxa uu yiri hadal alle agtiisa loogu jecelyahay waa afar kelimo oo ah 1:subxaana laahi 2:wal-xamduli laah,3:wa laa ilaaha ila laah, 4:walaahu akbar

Sida xadiiska kamuuqato xadiiskan hadalka looga jaceyl badanyahay alle agtiisa majiro, laakiin qaacido ayaa jirto taas oo ah digri mudlaq ah oo lala yimaado oo quraanka ka fadli badan majiro, sidaa dardeed digrigaan waa digriga ugu fadliga badan kadib aqrinta quraanka kariimka,

8:عَنْ أَبي أيوبَ الأنصَاريِّ  عَن النَّبيّ ﷺ قَالَ: مَنْ قالَ لا إلهَ إلاَّ اللَّه وحْدهُ لاَ شَرِيكَ لهُ، لَهُ المُلْكُ، ولَهُ الحمْدُ، وَهُو عَلَى كُلِّ شَيءٍ قَدِيرٌ، عشْر مرَّاتٍ، كَانَ كَمَنْ أَعْتَقَ أَرْبعةَ أَنفُسٍ مِن وَلدِ إسْماعِيلَ متفقٌ عليهِ.

Nabiga salallaahu calayhi wasalam waxa uu yiri qofkii dhaha: laa ilaaha ila lllaahu waxdahu laa shariika lahu lahul mulku walahul xadmdu wahuwa calaa kulli shey'in qadiir 10 mar, waxa uu lamidyahay

Asagoo xoreeyay 4 qof oo kamida caruurtii nabi ismaaciil.

**Macnaha oo gooban**

Nabiga nabadgelyo iyo naxariis alle dushiisa hayeelee waxuu yiri qofkii yiraahdo adkaarta aan kor kusoo xusay 10 mar waxa uu lamidyahay asagoo xoreeyay 4 qof, afartaas qofi waxa ay kamidyihiin caruurtii nabi ismaaciil.

Sababta loo leeyahay caruurtii nabi ismaaciilna waa in nabi ismaaciil fadli badan leeyahay, sidoakale nabi ismaaciil waxaa ku abtirsado nabi muxamed sallaahu calayhi wasalam, sidokale carabta oo dhan ama badankeed ayaa ku abtirsado Nabi ismaaciil,

9: قال رسول الله صلى عليه وسلم: من قرأ حرفا في كتاب الله فله حسنة والحسنة بعشر أمثالها فلا أقول الم حرف ولكن ألف حرف والميم حرف والياء حرف

Nabiga waxuu dhahay;Qofkii akhriyo xaraf kamida xaruufta kitaabka alle waxuu leeyahay 10 xanasaad, mana dhahayo alif laam miim waa xaraf balse alifka waa xaraf,laamkana waa xaraf,  miimkana waa xaraf,

**Manaha oo gooban**

Nabiga salallaahu calayhi wasalam waxa uu dhahayaa quraanka aqrintiisa 10 ama toban ajar ayaa laga helayaa, markaa qaabka looga helayaa waa sidee ayaa nabiga kajawaabayaa, hadii hal baal la aqriyo miyaa lahelayaa 10 ajar? Mise hadii 5 sadar  la

aqriyo ayaa lahelayaa 10kaas ajar, nabiga waxuu dhahay hal xaraf hadii aad aqrido ayaad heleysaa 10 ajar, hadane waxaa
isweydiin mudan xarfaha isla socdaa ma dhamaan tood ayaa laga helayaa 10ka ajar mise xitaa hadii ay isla socdaan midkiiba 10ka sigooni ah ayaa looga helayaa, nabiga waxuu dhahay alif laam miim(الم)oo ay suurado badan kubilowdaan biwlogaas ah alif laam miim ayaa kahelee 30 ajar sababtuna waa xarafka alif 10 ayaa kuxusan, xarafka laamne 10kale, xarafka miimne 10kale, markaa seddex tobonaad waa imisa? Waa 30.

Bal kawaran hadii alif oo geliya oo ay kuugu sugantahay 10 ajar halka alif laam miim ay kuugu sugantahay 30 ajar, bal kawaran hadii aad aqrido xisib ama 5 baal.

10: qodobka ugu dambeeya ee kamida cibaada qowliga waxaan kusoo xeriyaa baab weyni badan, ajarna badan, marna waajib inagu ah gaar Haan xiliga salaada gaar ahaan ataxiyaadka dambe, marna suno inoo ah sida dhamaan waqtiyada kale, waa saliga nabiga, salallaahu calayhi wasalam,

Fadliga kusalinta nabiga waa ay tiro badantahay oo masoo goobikaro Lakin qaar yar ayaan kasheegayaa, sababtuna waa in aan kabaqayo in uu buuugga noqdo buug xajmi weyn oo lagu caajiso, fadliga kusugan waxaa kamida

1:wuxuu yiri raasuulku s.c.w:{qofkii igu salliya hal mar, ilaahay ayaa ku saliyi toban jeer
2:Haka yeelina qabrigayga ciid ama feesto(meel loo qasdiyo), ee igu salliya, salligiinuna wuu isoo gaarayaa meel kastood joogtaanba

3:Wuxuuna yiri raasuulku s.c.w:{bakhaylku waa ka agtiisa la igu sheegay een igu salliyin}.

4:Wuxuuna yiri raasuulku s.c.w:{ Waxaa u sugnaaday ilaahay malaa-ig wareegta dhulka, kuwaas oo iga soo gaadhsiinaya umadayda salaanta}.

5:Wuxuuna yiri raasuulku s.c.w :{ majiro qof i salaamaya, haddii uu I salaa-mana, ilaahay ayaa iisoo celiya naftayda si aan uga celiyo(qofkaas) salaanta}.

6: qofkii nabiga kusaliyo 10 ajar loo qorayaa, 7:toban dembina waa laga tirayaa. 8:toban darajana gor loo qaadayaa. 9:haduu qofka nabiga kusaliya duceysto waa laga aqbalayaa ducada . 10: waa sabab lagu helayo shafeecada nabiga 11:dembiga in lagaa cafiyo ayuu sabab unoqonayaa 12:gurbada ayuu alle kaa feydayaa, 13: waxii aad ku hamiso oo dembi aheyn alle wuu kuu xaqiijinayaa, 14:xasuusta ayaa kugobocdo oo hadii aad wax hilaamto oo aad kusalido insha allaah waad xasuusan.

15:faqriga ayuu alle kaa ilaalinayaa .

Intaas waa waa faa'ido aduun iyo mid  aakhiro isugu jirto oo laga helayo saliga nabiga, laakiin aniga waa soo gaabiyay qofkii carabiga kufiican abnu Qayim[1] kitaab ayuu kaqoray fadliga saliga nabiga sallaahu calayhi wasalam, ilaa 40 faaido ayuuna sheegaa,  hadii aad afsomali kubaartana waad heli, oo culimo Somali ah si faahfaahsan uga hadashay ayaa jirta

***1:ibnu qayim waa:abuu Cabdulaahi shamsu-diin maxamed bin abii bakar bin ayuub. Waxuu Caan ku yahay  ibnu qayim aljowsi waa caalim weyn oo noolaa  691H –751 kitaabada uu qoray waxaa lagu sheegaa 98 kitaab,  waa caalim weyn oo  waxkasoo bartay caalimkii lagu naabeysay sheekhii islaamka ee ibnu taymiya, sheekhul islaam ibnu taymiya ayaa soo waxbaray(axmed ibnu cabdi xaliim)mad-hab ahaan waa xanbali caqiido ahaana ahlu sunna waljameeca.***

## Cutubka 2aad adkaar gaar ah(Muqayad)

Cutubkii koowaad waxa aad soo aragtay ducooyin iyo adkaaro xilikastaa lala imaakaro, balse cutubkaan labaad waxa aad ku arki doontaa adkaar gaar ah oo waqti gooni ah lasameeyo, oo xilikastaa lala imaaneynin, Lakin kuxeran waqti gooni ah ama meel gooni ah.

Ducooyin iyo cibaadooyinkale oo tiro badan ayayna isugu jiridoonaan.
Waxaanse kubilaabayaa adkaarta aad dhaheyso markii aad soo toosto oo aad ogaado in aad nooshahay soona toostay adigoo xalay saacado dhowr ah hurdayay waa adkaarta kasookicidda hurdada la aqristo yacni markii lagasoo kaco hurdada. Waxaadna dhaheysaa intii nabiga dhahay oo ah:

1:عن حذيفة بن اليمان رضي الله عنهما ، و عن أبي ذرّ رضي الله عنه قالا : كان رسول الله صلى الله عليه و سلم إذا أوى إلى فراشه قال : (( باسمك اللهم أحيا و أموت )) ؛وإذا استيقظ قال:((الحمد لله الذي أحيانا بعد ما أماتنا، وإليه النشور

Nabiga waxuu dhihijiray marka uu firaashkiisa dago(sariirtiisa) bismika laahuma amuutu wa axyaa, markii uu kasoo kaco hurdadana alxamdulilaahi ladii axyaanaa bacda Maa amaatanaa wa ilayhi nushuur.

**Macnaha oo gooban**

Halkaan xadiiska gor kuqoran waxaa kuxusan labo adkaar oo ladhahayo markii hurdada la aadayo oo sariirta lagu seexdo iyo markii laga soo tooso, ducada hurdada kahor ah oo la aqrinayo inta aan laseexan kahor waa waa bismika-allaahuma amuutu wa axyaa oo ah Somali ahaan( ilaahow waan hurdayaa aniga oo ku gaalmeysanayo kuna dhimanayo magacaaga kuna noolaanayo) yacni gaalmadaada rabo sida in aad iga xafido sharka habeenkii oo dhan,
iyo markii aad soo toosto subixii aad dhaheyso: alxamdulilaahi ladii axyaanaa bacda Maa amaatanaa wa Ilayhi nushuur.
Macnaheedana waa(rabigii nasoo nooleey kadib dhimashadii aan galnay ayaa mahadleh)

**Sua'aal waa maxay dhimashadu?**

Yacni ducada soo kuma aadan dhihin allahii nasoo nooleey dhimashada kadib, markaa dhimashadaasi waxay? jawabatu waa huradada ayaa ah dhimasho yar oo qofku geleyo, qofku waxa uu lamid yahay dhanka dareenka sida qofdhintay oo kale sidaa dardeed ayaa

lagu tilmaamay dhimasho yar, sidaa dardeed ayaad markii aad soo toosto uleedahay mahad waxaa leh allahii isoo nooleey dhimashadii kadib.

قال رسول الله صلى الله عليه وسلم أ: ما من عبد يقول في صباح كل يوم

ومساء كل ليلة: بسم الله الذي لا يضر مع اسمه شيء في الأرض ولا في السماء وهو السميع العليم، ثلاث مرات لم يضره شيء.

Rasuulka salallaahu calayhi wasalam waxa uu dhahay: qof adoon ah oo dhahayo maalinkasta subaxeeda iyo galabkasta 3mar Bismilahi ladii layaduru macasmihi shey'un fil ardi walaa fi samaa wahuwa samiicul caliim, ilaa haduu jiro qof dhahayo waxdhibayo majiraan.

**Macnaha oo gooban**

Nabiga nabadgelyo iyo naxariis alle dushiisa hayeelee waxa uu dhahay majiro qof dhahayo adkaarta gor kuxusan soomaali-geedana yahay(waxaan magan gelayaa magaca alle, magacaas oo qofkii magen galaa uu san dhibikarin waxkusugan dhulka iyo wax kusugan cirka)

Ogow 3jeer ayaad kucelineysaa subixii, galabtiina 3mar ayaad sidookale aqrineysaa.

Markaasne wax cirka kusugan oo kudhibayo majiraan iyo wax dhulka kusagan labadaba, yacni sharkastaa alle ayaa kaa ilaalinayo,
Weydhicikartaa in dhibkuu qornaa kugu dhaco Lakin hadii uu dhib-kusoo gaaro xitaa saameyn kuguma yeelanyo insha Allah,

Yacni Shar kuguma dhaceyso hadii aad subixii tiraahdo ilaa aad galabtii kagaarto.

**Mas'alo muhiim ah**

Goormu ayuu subixii kabilaabanaa, goormuuse dhamaanaa? Galabtiina ayaduna waa waqtigee?

Si aad subixii aad utiraahdo ducadaan waa in aad garataa macnaha subxii, maadaama uu shaki gelikaro dadka qaar,

Subixii waxaa ladhahaa markii ay qoraxdu soo baxdo ilaa duhurkii, waqtigaas ayaad aqrineysaa ducadaan subxii la aqristo,

Galabtiina waxa ay kabilaabanee casarkii ilaa qoraxdu kadhacdo, sidaas dardeed galabtii waxa ay kabilaabanee casarkii ilaa qoraxda kadhacdo, ra'yikale ayaa jiro oo dhahayo galabtii waxay kabilaabataa duhurkii oo waxii duhurka kadambeyo waa galab
Ducada subixii qoraxda soo bixideeda kahor waad dhihikartaa sida marka uu fajarka dhasho.

Mana lasoo qaleynayo hadii aad hilmaando, yacni hadii aad hilmaando ducada subixii Lakin soo xasuusato waqtigeeda dhexdiisa xiligaas ayaad la imaaneysaa, laakiin adkaarta subixii adigoo hilmaamay oo ay galabtahay ama habeen tahay oo uu waqtigeedii degay lama soo qaleynayo.

Ducadaan waxaa kale oo la aqristaa xiliga aad xanuusantahay oo meesha kubugta gacanta saar oo ku aqri.

2وعن مُعَاذِ بنِ أَنسٍ  قَالَ: قَالَ رسُولُ اللَّه ﷺ: مَنْ أَكَلَ طَعَامًا فَقال: الحَمْدُ للَّهِ الَّذِي أَطْعَمَني هَذَا وَرَزَقْنِيهِ مِنْ غيْرِ حَوْلٍ مِنِّي وَلا قُوَّةٍ؛ غُفِرَ لَهُ مَا تَقَدَّمَ مِنْ ذَنْبِهِ رواه أَبُو داود، والترمذي وقال: حدِيثٌ حسنٌ.
Rasuulka salallaahu calayhi wasalam waxuu yiri: qofkii raashin ama cunto cuno oo dhaho alxamdulilaahi ladii adhcamanii haadaa wara saqaniihi min qeyri xoowlin minii walaa quwah,
Oo ah (waxaa mahad leh ilaahii igu quudiyay raashinkaan oo igu irsaaqay, awood iyo xeelad aniga aan laheyn. dembiigiisa waxii hore maray ayaa loo dhaafayaa

**Macnaha oo gooban**
Rasuulka waxuu dhahay qof kii dhaho ducada gor kuxusan marka uu raashin cuno kadib, alle dembigiisa hore ayuu udhaafayaa!
Dembigaagii hore ee aad sameysay cunta cunistaan kahor ayaa laguugu dhaafayaa ducadaas yar, ducadaas fudud ayaa dembigaagii hore laguugu dhaafayaa, allaahu akbar naxariista alle weynaa, balse alle hanaga dhigo kuwii caado kadhigto.

3:قال رسول الله صلى الله عليه وسلم: من قرأ آية الكرسي دبر كل صلاة لم يمنعه من دخول الجنة إلا أن يموت

Rasuulka waxa uu dhahay qofkii salaadaha gadaashooda aqriyo aayatul kursi wax janada kaxigo malaha oo aan aheyn inuu dhinto.

***Macnaha oo gooban***

Rasuulka salallaahu calayhi wasalam waxa uu yiri: qofkii salaada markii uu kabaxo ee salaamo naqsado aqriyo aayatul kursi jano ayuu geleyaa janadaasina wax kaxigo geliddeeda malaha oo aan aheyn kista yar ee uu noolyahay, oo haduu dhinto wuu gelidoonaa

Markaa sida uu xadiiska tilmaamayo waxaa cad in aayatul kursi tahay sabab kamida sababaha janada lagu galo, hadii dembiyo yaryar laheydna digrigaan quranka kamidyahay sida Aaytul kursigaan aanu dultaaganahay ayaa luguugu dhaafayaa, waxii dembiyo waa weyn ahna waa in towbada aan kadhigano caado si naloogu dhaafo.

4:جابر بن عبدالله عند البخاري -رحمه الله- عن النبي ﷺ أنه قال: من قال حين يسمع النداء: اللهم رب هذه الدعوة التامة، والصلاة القائمة، آت محمدًا الوسيلة، والفضيلة، وابعثه مقامًا محمودًا الذي وعدته إلا حلت له شفاعتي يوم القيامة

Nabiga waxuu yiri qofkii dhahaa marka uu maqlo aadaanka allaahuma raba haadi dawcati taamah, wasalaatil qaa'imah, Aati muxamedenil wasiilada wal fadiilah, wabcas-hu maqaama-maxmuudaa(allaaha leh dacwaan"diinta" dhameyskatiran, iyo salaadan timid, sii muxamed darajada wasiilada iyo fadiilada kunasoo saar meel lamahdiyo,

intaas qofkii yiraahdo aadaamka dabadii nabiga waxuu dhahay shafeecadeyda ayaa uwaajibtay, oo uu heleyaa maalinta qiyaame.

5:أبو هريرة عن النبي ﷺ أنه قال: من سبح الله دبر كل صلاة ثلاثًا وثلاثين، وحمد الله ثلاثًا وثلاثين، وكبر الله ثلاثًا وثلاثين، فتلك تسع وتسعون، وقال تمام المائة: لا إله إلا الله وحده لا شريك له، له الملك، وله الحمد، وهو على كل شيء قدير؛ غفرت خطاياه ولو كانت مثل زبد البحر. خرجه مسلم في صحيحه.

Rasuulka salallaahu calayhi wasalam waxaa laga wariyay ama abuu hureyra kawariyay inuu dhahay qofkii alle utasbiixsado 33 jeer, salaadkasta kadaasheed, umahadnaqa 33 jeer, utakbiirsada 33 jeer, intaasi waa 99, ee boqolka ugu dhigo ilaah xaq lagu caabudo majiro oo aan allaah aheyn, allaahne waa ka waxkasta awooda, dembigiisa oo dhan ayaa loo dhaafayaa haba la ekaadaan xumbada badda e,

***Macnaha oo gooban***

Nabiga waxa uu yiri qofkii salaadaha markii uu kabaxo utasbiixsado alle, yacni dhaho subxaanaha laaha 33 jeer/mar, alle umahadnaqo 33 jeer(dhaho alxamdulilaahi) utakbiirsado allaah 33[dhaho allaahu akbar), intaasi waa 99 e, kuboqoleeyo(laa ilaaha ila-llaahu waxdahu laa Shariika lahu lahul mulku walahul xadmdu wahuwa calaa kulli shey'in qadiir) alle dembigiisii ayuu dhaafay jeer ay tiro badni ka qabaan xumbada bada, xumabada badda sawirkeedii horay usoo marnay,

Markaa fadli weyn ayaa kujira in markii aad salaada ka salaamo naqsado tiraahdo subxaana laah 33, alxamdulilaahi 33, allaahu akbar 33, markii aad iskusoo darto 33 subxaana laahi ah iyo 33 alxamdulilaahi ah iyo 33 allahu akbar ah waa 99 e, boqol uga dhig laa ilaah ila-llaah waxdahu laa Shariika lahu lahul mulku walahul xadmdu wahuwa calaa kulli shey'in qadiir

- Intaas markii aad tiraahdo maxaa kuu xasilay mataqaan dembi dhaaf weyn,

Cutubkaan halkaan ayuu ku dhamaaday hadii aad buugga ku aqrineysid qaab pdf ah fadlan soo daabaco si aad maalinkasta si fudud ugu soo qabsado, werdiyoomiye ahna kuugu noqdo, Hana dhihin waan soo daabaca doonaa ee dheh go'aan waaye insha allaah maalinkaas ayaa soo daabaca doonaa.

***Mas'alo muhiim ah***

Cutubka 2aad insha allaah halkaan ayaa kusoo gabagabey-doonaa balse maadaama 2daan cutub ay kahadlayeen adkaaaro guud oo mudlaq ah iyo kuwo gaara oo muqayad ah

in la xisaabsado tasbiixdaada iyo guud ahaan wanaagaagana ay tahay arin muhiima si aad uxisaabido naftaada inta uu la egyahay wanaagga ay qabato, sidaa dardeed ayaan kahadli doonaa waxyaabaha wax lagu xisaabsado sida faraha iyo tusbaxa,

waxaan kahor Mari doonaa in faraha lagu xisaabsado digriga ama tasbiixda.

Ugu horeyn khilaaf kamajiro in faraha lagu xisaabsado tasbiixda iyo guud ahaan adkaaraha uu qofka la imaanayo,
Wanaaga ay leedahay in faraha lagu xisaabsado adkaarta waxaa kujiro siro badan sida in maalinka qiyaamaha ay hadlayaan oo ay marqaati furidoonaan waxii wanaag ah ee lagu sameeyay,

Sida uu rasuulka nabadgelyo iyo naxariis alle dushiisa hayeelee uu sheegayba oo nabiga waxuu yiri:

قال: النبي صلى الله عليه وسلم"يا نساء المؤمنات: عليكن بالتهليل ، والتسبيح، والتقديس، ولا تغفلن فتنسين الرحمة، واعقدن بالأنامل؛ فإنهن مسؤولات مستنطقات

Xadiiskaas waxaa kucad in uu nabigu yiri dumarka mu'minaatka ahow dhaha oo badiya laa-ilaaha ila-llaah iyo subxaana allaahi, iyo dhahirada alle xumaan laga dhahiro sida in aad tiraahdaan subxaana malikil quduus, Hana kadaginaha digrigaas in aad tiraahdaan, digrigaasne kutirsada farihiina, maxaa yeelay faraha waa kuwo masuulka ah waxa ay sameynayaan oo maalinta qiyaame hadli doono oo sheegi doono waxa ay sameynayeene,

Sida xadiiskan kucad nabiga waxa uu amray in lagu tirsado adkaarta faraha,

Sidokale ficil nabiga kasugan waaye in gacmaha ama faraha lagu tirsado tasbiixda, oo waxuu Cabdulaahi bin camar leeyahay “nabiga ayaan arkay oo gacantiisa kulaabayo tasbiixda” yacni marka uu tasbiixsanayo faraha laabayo oo ku tirsanayo, iyo axaadiis kale oo tiro badan oo faraha tilmaamaya.

***Tusbaxa***

Marka loo yimaado tusbaxa culimada waa ay isku qilaafeen in lagu tirsado tasbiixda waxa loo yaqaan tusbaxa, hadalka oo gooban gacanta in lagu tasbiixsado khilaaf kama jiro Lakin in tusbax la adeegsado khilaaf ayaa kajiro, markaa gacanta in ay tusbaxa kafadli badantahay Shaki kumajiro.

Marka loo yimaado tusbaxa, sida aan anigu isleeyahay ee ila saxan waa sida culimo badan ay qabaan oo ah in ladhihin dhamaan tusbax oo dhan ma banaano, oo waa xaaraam, sidookalena ladhihin tusbaxkastaa hala qaado wax dhib ah oo kujira malaha e,

Lakin sida saxda u dhowi waa in tusbaxa qaadashadiisa ay banaantahay oo la qaadakaro Lakin ay sharuud kubanaantahay sida culimo badan iyo kuwo mucaasariin ah ay qabaan sida caalimka aan culimada casriga ugujeclahay ee ibnu cuthaymin, oo sharuudaas hadii lafuliyo ay banaanyahay hadii lafulinina ay banaaneynin,

Sharuudahaas waxaa kamida
1: qofka xiranayo in uu aaminsanaado in gacanta oo lagu tasbiixsado kafiicantahay In uu tusbax qaado, maxaa yeelay gacanta waa ficil nabiga kasugnaaday.

2:in ay sida inta badan suufiyada sameeyaan ee ah in tusbaxa laga aamino nooc cibaadada kamida oo uu aamino in ka wanaagsanyahay in gacanta lagu tasbiixsado, in uu sidaa sameynin qofka qaadanayo tusbaxa ee uu khilaafo suufiyadaas ayaga ah,
3: in uu uqaadanin qaab uu kufaanayo sida ay suufiyada sameeyaaan qaarkood, oo waxa aad arki wadaadka suufiga ahi inta uu midka kale ka weynyahay ayuu katusbax weynyahay, qoorta ayuuna sudhanayaa asagoo tusbaxyada yaryar qaadaneynin oo qaadanayo noocyada aadka uwaaweyn markaa ayuu qoorta dhowr jeer kusoo laba-laabayaa sida in uu yara kufaananayo uu leeyahay **hayaay maaniga tusbaxaa sida**,

qaarkoodna caqiido faasid ah ayay aaminsanyihiin oo ah in ficilkii nabiga ee ah in gacanta lagu tasbiixsado uu kafadli badanyahay tusbaxaan ay Lalminayaan, qodobkaan soo goobistiisu waa in qofka ahlu sunnaha ah ee tusbaxa xiranaya in uu khilaafo qaabka ay suufiyada uxirtaan, hadii sharuudahaas lahelo sida culimada qabaan waa in uu banaanyahay in tusbax laqaado.
Cibaadadana marwaliba in Laqarsado oo allaah oo geliya kula ogaado ayay kufiicantahaye waa in tasbiixda laxisaabsanayo laqaado tusbaxyada noocyada yaryar ee indhaha dadka yara Kaqarsoomikaro Ama aan aheyn tusbaxyada waaweyn ee qofka soosocdo halkaaba ka arkikaro.

Cutubka 3aad: cibaado ficil ah

Cutubkaan 3aad insha allaah waxaa ku xusidoonaa dhowr cibaado oo ficli ah ama fal lasameynayo ah,

labadii cutub ee hore waxa aanu kusoo sheegnay dhowr cibaado oo qowli ah ama hadal ah oo afka uun laga dhahayo oo ubaahneyn wax sameyn ama fal ah, laakiin cutubkaan dhamaantiis waxa uu noqo doonaa ama kahadli doonaa dhowr cibaado oo fal ah yacni inta dhaqaaq lasameeyo la lala imaandoono.

Balse waxa ugu horeeyo ee aan uga hadli doono waa towbada, ama towbadkeenka uu qofka allaah utowbo keenayo, sababta aan towbada ugu bilaabayo waa in ducooyinka ama guud ahaan adkaarta aan labadii cutub ee hore kusoo xusnay ee badankood danuubta dadka kameyro ama kadhaqo waxa ay uun kaameerayaan ama kaadhaqayaan waa danuubta yaryar, sida ay culimada ubadanyihiin marka laga reebo imaamu albaani[2] oo qabo in xitaa kuwa waaweyn lagu dhaafayo,

Lakin sida loo badanyahay waa in saqaa'irta uun lagu dhaafo oo dembiyada waa weyni waxa ay ubaahanyihiin in qofkii kudhacay uu ka towbo keeno,
Markaa si saqaa'irta ama dembiyada yar-yar naloogu dhaafo waa in aan badinaa ducooyinka kuxusan labadii cutub ee hore jawadwal maalinle ahna aan kadhigano.
Sidokale si dembiyada kabaa'irta naloogu dhaafo waa in aan
towbada badinaa oo iyadane aan kadhigano in qaab maalinle ah ama maalinkasta ah aan utowbo keeno, hadii aad towbadkeentana allaah wuu kaa qabalayaa kuuna dhaafaya Dembigii aad uga towbokeentay insha allaah.
Markaa allaah hanaga mid dhigo kuwa markasta allaah utowbo keen.

**Towbada**

Towbada waa in allaah loo laabta lagana laabto dembiyada, ogow in aad dembi kudhacdaa ceeb maaha oo macsuum(ilaalsane) maahid, Lakin waxaa ceeb ah in aad ku adkeysado dembigii oo aad rabigaagii aad caasisay aad uga towbo keeni waysid,

---

2:imaamu albaani waa sheekh muxamed naasirudiin albaani, hadii aad maqasho xadiiskan waa saxiix qofka ugu horeeyo ee wuu saxiixiyay la leeyahay waa albaani, sheekha waxa uu kasoo jeedaa dalka Albania oo uu kudhashay, sheekha waa caalim weyn oo noolaa sanadaha 1333H—1420 waxuu ahaa muxaqiq salafi sunni ah oo ku caanbaxay kala saarida axaadiista saxiixa ah iyo kuwa daciifka ah, caalim kamida culimda ugu waa weyn mamlakada sacuudi carabiya, kutubtiisa waxaa kamida kuwa somalida kudhexfaafsan sida kitaabka sifatu salaadi nabiyi iyo kuwo kale. Waxa uu qoray dhowr kitaab oo ugu caansan yihiin kitaabada uu kukala qoray axaadiis daciif ah iyo kuwa saxiixa ah, naxariista alle ee janada allaah kawaraabiyo

Towbada dadka qaar iney fahan saneyn ayaa laga yaabaa oo ay uheestaan in saacado badan masaajid lagu jiro, ama in nolosha caadiga iyo waxyaabaha mubaaxa ah[3] laga dago iyo in 50 salaadood ladukado hadii intaa lala imaana ay towbadu ansaxmeynin, taasina waa qolowi[4] isku adkayn amuurihii allaah fududeeyay leysku adkeynayo, yacni inta aan soo sheegnay sida qofka in masjidka uu galo oo uu aado in uu sunooyinka badiyo dhamaan waa waxyaabo wanagsan oo suno ah Lakin in shardi looga dhigo towbada maaha, oona ladhaho arimahaas la'aantood towbada majireyso.

Markaa waa in loo fudeediyo sidii allaahufudeediyay, oo qofka asaga oo suuqa maraya hadii uu dembi kudhaco waa in asaga oo suuqii marayo uu katoobo keeno, oo wax adag laga dhigin

Sidaas daraadeed ayay muhiim tahay in aan cadeyno qadarka ama inta ay qofka towbada kaga ansaxmado, si ayna dadka towbada arin aad uculus inta ay moodaan aysan uga gaabinin

Horta shey waliba oo cibaado ah sharuud ayuu leeyahay, hadii sharuudaas lala imaakari waayo ansaximeyso cibaadadaas, hadii lalayimaadana alle doonistiisa ayay hoostaal oo hadii uu doono wuu aqbali hadii uu doonana aqbalimaayo, laakiin anaga markasta waa in aan wanaajino malaha aan allaah kaqabno, oo hanoqdo marwalba malaha toosan, baryadana badino si nalooga aqbalo.

Markaa sharuuda towbada waa ilaa 5 sharuud hadii aan la imaano sharuudahaas allaah wuu naga towbad aqbalayaa, laakiinse waa in aan kudedaalno sharuudahaas.

---

**3:mubaax:waa waxyaabaha banaan ee dembina kujirin ajarna kujirin sida dalxiiska, ganacsiga, iwm.**

**4:quluwi waa in shey lagu xadgudbo oo xadkiisa ladhaafiyo.**

.

Sharuudahaas waa:

1:ikhlaas: in uu towbadiisa uu allaah qofku u khaalis yeelo, cibaadada waxa ugu horeeyo ay kudhisantahay waa ikhlaas iyo in allaah dardiis loo sameey, cidkale aan waji looga raadsan, cidkale sumacad looga raadsan, allaah uun ajar looga raadsado, allaah uun jano looga raadsado, allaah
uun cadaablooga magangalo, allaah uun wanaag aduun iyo mid aakhiro looga raadsado.

2: in dembiga laga dhexbaxo ugu horeyn, hadii aad dembigii qofka towbad keenayo kudhexjiro oo hadane leeyahay waan towbadkeenayaa dee waxayba noqokartaa jees jees oo towbo maaha.
Qaabka looga dhexbaxayo dembigana waa in hadii qofka towbo keenayo uu sameeyay shey dembi ah, dembigane labo midkood ayuu noqokaraa in uu yahay dembi insaanka ama aadanaha laga galay, ama inuu yahay dembi allaah laga galay,

Hadii uu yahay dembi bani'aadam laga galay waxaa waajib ah si ay towbadu u ansaxmado in sheygii dembiga loogalay loo celiyo sida hadii ay yihiin wax laga xaday, hadii aan loo celikarin waa in qofkii loo dago oo lagu yiraa iskeycafi qaladkaas ayaan kaagalay mana awooda in aan kuugudo e, haduu kucafiyo waa kaas, hadii kale ixsaano usameey Kuna Celceli in uu kaa-saamaxo qaladka aad kagashay, hadii hadal aad kasheegtay yahayna In aad udagto oo aad hadalkii xumaa ee kasheegtay u sheegto kadibna icafi tiraa waajib kuguma ah oo waxaa kuu banaan kuuna sahlan in aad xumaantii aad lasheegtay wanaag lamida aad kasheegto, oo aad wanaag kusifeyso, dadkii aad kuhor fadeexeysayna aad kuhor amaando, sidii asagoo ku ogeyn aad wax xun ugasheegtay uun bedelkeeda wax wanaagsan uga sheeg, intaas ayaa kugu filan.

Qaladka bani'aadamka waa sidaas oo waa in asaga loo dagaa oo lacafisweydiistaa, hadii wax asaga leeyahay lagu xadgudbay ama laga qaaday hadii hadal ahaan loogu xadgudbayna hadal ahaan loo amaano, kadibna allaah lacafisweydiiso

Hadii uu qaladka yahay qalad allaah laga galay sida shey uu allaah dadka ka  xarimay oo lasameeyo, ama shey uu allaah dadka ku waajib yeelay oo la dayaco ayadane waa in sheygii xaaraamta ahaa ee lasameeyay allaah looga towbadkeeno, sidokale sheygii waajibka aah ee ladayacayna lala yimaado hadii uu kamid yahay waajibaadka dib loosoo qaleeyo, intaas waa shardiga 2aad

3: shardiga 3aad waa in laga qoomameeyo ama laga shalaayo dembigii lasameeyay, yacni hadii uu kala saxanyahay dembigii laga towbadkeenayay dee taasi waa ciyaar, markaa waa qasab in qofka uu garowsado in uu qaladgalay, kadibna qaladkaas uu galay kashallaayo ama kaqoomamayo, qaabka looga qoomameynayana waxweyn maaha oo waa in uu qofka qalbiga kaqirto in uu xumaan sameeyay allaahna caasiyay.

4: go'aan: in uu qofka go'aan gaaro ah in uusan dib dambe ugu laabanin dembiga uu hada katowbad keenayo, yacni in qofka go'aansado in uu waligii dambe uu kulaabaneynin dembiga uu maanta katowbad-keenayo, hadii uu isleeyahay dib ugu laabo dembigii hadane ka towbadkeen dee taasi towbo maaha sharuudaheedii dhameystiratay, markaa waa lagama maarmaan in uu qofka go'aansado  in noloshiisa uu mardambe kulaabadoonin,

5: in ay towbadu dhacdo waqtigii qofka laga aqbalayay, hadii ay kadib dhacdo towbada waqtigii qofka laga aqbalayay wax utarimayso in uu xiligaas towbo keeno, waqtiga aan qofka towbada laga aqbalaynina waa 2 waqti, labadaas waqti waa:

1:markii ay qoraxda kasoo baxdo galbeed/qoraxsin/meesha ay qoraxda udhacdo ee cagsiga ku ah halka ay kasoo baxdo. Hadii ay mar qoraxda kasoo baxdo galbeed ama qoraxsin wax towbo ah oo qofka laga aqbalayo majiraan sida ay nasuusta tilmaameyso, xiligaas waa xiliga uu qiyaamuhu dhacayo markaas qofkii towbokeeno laga aqbali maayo, markaa Fursad ayaynu heysanaa ee allaah Hana waafajiyo,

2:marka labaad ee qofka laga aqbaleynin towbada waa markii ay qofku kusoo xaadiro mowtka ama geerida, xiligaas ayadana towbada lama aqbalo nabigane waxuu dhahay allaah towbada qofka wuu aqbalaa intii uusan dhuunyeerinin oo geerida ama sakaraatu mawdka kusuganyahay,

Markaa waa in aan towbadkeenaa kahor inta ay naqabsan 2daan qodob qodobkamida, markaa waliba qodobka dambe waa in aan kadaxadirnaa Mala oga in aan xili dhow dhimarabno, markaa waan in aan carabkeena caado uga dhigno towbada alle, waa ficilyar towbada oo aad ufudud Lakin dhicikarto in laguugu dhaafo dembiyadaadii oo dhan kuwii yaraa iyo kuwii weynaa maxaa yeelay rasuulka waxa uu dhahay التائب من الذنب كمن لا ننب له oo macnihiisu yahay qofka dembiga ka towbo keenayo waxuu lamidyahay qof aan dembi laheyn, xadiiskaan iyo aayado badan oo fahamgoodu xoojinayo xadiiska ayaa kusugan in towbada lagu dhaafo dembiyada oo dhan,

Xitaa hadii aad isleedahay maalmahaan dembigaaga waa yaraa fadlan nafta yeyna kugedinin ee kadiid hadalkaas oo towbada u orod, sababtuna waa danaa ee iiga jawaab su'aashaan:bal kawaran adiga iyo nabi muxamed sallaahu calayhi wasalam midkee dembi yar baad isleedahay? Shaki kuma jiro in aad niyada katiri subxaana allaah oo ma nabigii macsuumka ahaa iyo anigaan?

Waa sax oo nabigii macsuumka ahaa ee muxamed sallaahu calayhi wasalam muuna kugadsoomin in dembigiisa kiisa hore iyo midkiisa dambaba ladhaafay, in asaga oo nool janada loogu bishaareey oo wuu is ogaa nabiga in uu janada qofka ugu horeeyo ee gelayo yahay, sida xadiis kusheegayna nabiga waxuu yiri aniga ayaa ah qofka ugu horeeyo ee albaabka janada loo furayo malaka furayana uu dhihidoona Amar ayaa leygu siiyay in muxamed uu ahaado qofka ugu horeeyo ee albaabkan kafuro,

Nabigii sidaas ahaa yaa dhahaya bal kawaran sidan:

عن أبي هريرة رضي الله عنه قال: سمعت رسول الله صلى الله عليه وسلم يقول: والله إني لأستغفر الله وأتوب إليه في اليوم مائة مرة

Xadiiskan macnihiisa waa: abuu hureyra allaah haka raali-noqdee baa dhahayo rasuulka ayaan maqlay oo dhahayo wallaahi anigu alle ayaan dembi dhaaf weydiistaa una towbadkeenaa maalinkii boqol jeer.

Bal kawaran nabiga oo dembigiisa ladhaafay, janada in uu geleyo loo sheegay, in uu allaah Khaliil kadhigtay og sida uu nabi ibraahiimba Kahlil uga dhigtay, og fadliga alllaah agtiisa uu kaleeyahay intaas oo dhami kuma gedsoomin muu dhihin dembigeyga waa la dhaafay ee wuu dedaalayay, markaa miyay kulatahay in naftaadu kugugedikarto camal Yar oo aad sameyso,

Waligaa nabiga tusaale hakuu nodo oo kutayo, hadii aad nabiga kudayado oo laguugu dhexduuro bad weyn faqri, dhib, culeys ah maquusa doontid,

Hadii dhankagale laguugu dhexduuro ama laguugu imtixaano bad weyn nicmo guureyso ah sida, hanti farobadan,caafimaad, xoog, barwaaqo kasta, lagama yaabo in aad ismahadiso oo aad kibirto.

Hadii towbadaada sharuudahaas gorkuxusan kula timaado insha allaah waa lagaa aqbalayaa.

***Masalo muhiim ah***

*Hadii aad dembi kudhacdo deedna aad ka towbadkeento hadane aad dembigii kulaabado hadane katowbad keento hadan… hadane.*

*Yacni Marar badan kudhacday hadane aad katowbadkeento miyaa lagaa aqbalayaa? Ama makaa ansaxmi toobadaasi?*

*Sida kucad xadiiskan nabiga waxa uu yiri*

عن أبي هريرة قال سمعت النبي صلى الله عليه وسلم قال عبدا أصاب ذنبا وربما قال أذنب ذنبا فقال رب أذنبت وربما قال أصبت فاغفر لي فقال ربه أعلم عبدي أن له ربا يغفر الذنب ويأخذ به غفرت لعبدي ثم مكث ما شاء الله ثم أصاب ذنبا أو أذنب ذنبا فقال رب أذنبت أو أصبت آخر فاغفره لي فقال أعلم عبدي أن له ربا يغفر الذنب ويأخذ به غفرت لعبدي ثم مكث ما شاء الله ثم أذنب ذنبا وربما قال أصاب ذنبا قال قال رب أصبت أو قال أذنبت آخر فاغفره لي فقال أعلم عبدي أن له ربا يغفر الذنب ويأخذ به غفرت لعبدي ثلاثا فليعمل ما شاء

Xadiiskan nabiga waxa uu kuleeyahay: adoonka waxa uu kudhacaa dembi markaa buu dhahaa: rabiyow dembi ayaan kudhacay ee rabiyow ii dembi dhaaf, markaas buu allaah dhahaa adoonkeyga waxuu gartay in uu leeyahay rabi udhaafo dembiyada sidokalena uqabta dembiyada, balse Waan udhaafay adoonkeyga dembigaas.

hadane cabbaar(waqti) ayuu joogaa hadane wuu kudhacaa dembi markaa ayuu hadane yiraa rabiyow dembi ayaan kudhacay ee iidhaaf dembigeyga, markaas buu allaah dhahaa adoonkeyga waxuu gartay inuu leeyahay rabi udhaafa dembiyada sidokalena uqabta Markaa buu alle leeyahay adoonkeyga waan udhaafay dembigaas.

Hadane waqti ayuu joogaa intii uu alle doono ah markaa ayuu kudhacaa dembkale markaa buu hadane dhahaa rabiyow dembikale ayaan asiibay kadibna allaah ayaa dhahaya adoonkeyga waxa uu gartay in uu leeyahay rabbi udhaafa dembiga sidokale uqabta, waan udhaafay adoonkeyga dembigiisa, Ee ha sameeyo waxii uu doono. Xadiiskan bal eeg weyniga raxmata Allaah ee kuxusan yaa kariim.

***__Waxa laga fahmayo xadiiska__***

1:in uu allaah markasto Aqbalayo towbada qofka.

2:in hadii dembi lasameeyo hadane laga towbo keeno hadane dembigii lasameeyo markale inuu dembigaas aysan waxbo kaqabaneynin towbadii kahoreysay ee uu lahaa dembigii hore balse loo baahanyahay in dembiga iyo towbada ay towbada dambeyso.

3: in hadii uu qofka dembi galo hadane sheydaan kuriixo dembigii markale, uu hadane kasoo laabto dembigii in uu allaah ka aqbalayo towbada, markasta uu qofka dembi sameeyo uuna towbo keeno waa laga aqbali towbada oo nabiga ayaa dhahaya أتائب من الذنب كمن لا ذنب له. Oo ah qofkii ka towbad keenayo dembiga waxuu lamidyahay qof aan dembi laheyn.

Halkaan Imaamu nawawi[5] waxuu yiraahdaa hadii uu qofka kun dembi sameeyo, kun marna dembikasto gadaashii sameeyo towbo, allaah wuu ka towbad aqbalaa, sidokale hadii uu Kun dembi hal towbo kadib mariyo dhamaan-dood ayadana waa saxiix oo waa laqaatay.

---

5: imaami nawawi magaciisa:waa abuu zakariyah yaxyaa binu sharaf annawawi, imaamu nawawi waa sheekha leh kitaabka uu macalinkaagi dugsiga quranka kuusoo aqriyay ee arbaciinka(macalimiinta dugsiga quranka ardayda wey u aqriyaan kitaabkan inta badan) sidokale sheekhan waa sheekha leh labo kitaab oo somalida dhexdooda Caanka ah oo kala ah kitaabka riyaadu saalixiinka iyo minhaajka, waxuu kale uu leeyahay kitaab ladhaho rawdadu dhaalibiin oo somalida dhexdeeda caan ka aheyn yacni loogama aqriyo intabadan sida labadii hore iyo kuwakale. Sheekhan waa caalim weyn oo noolaa sanadaha 631H—676H. Waxuu raacsanaa mad-hab ahaan mad-habka shaaficiga, caqiido ahaana siguud caqiidada ahlu sunnaha.

4:xadiiska aakhirkiisa fiiri waxaa udambeeyo xadiiska allaah oo dhahayo adoonkeyga waxa uu gartay allaah udembi dhaafo anigane waa udambi dhaafay ee hasameeyo waxii uu doono, kelimada ah hasameyo waxii uu doono maxaa laga wadaa? Ha ufahmin in lagawado in uu alle dhahayo adoonkeyga waan udembi dhaafay ee waxii uu rabo ee macsiyo iyo xumaana hasameeyso sidaas maaha, laakiin sida lagawado uu allaah dhahayo waa adoonkeyga hasameeyo in xumaankasta ka towbadkeeno sida uu hada dembikasto ulahaa rabiyow icafi dembi ayaan sameeye dembikasta oo uu kudhaco sidaa haduu sameeyo anigane waan udhaafiye, sidaas laga wadaa.

In uu qofka kulaabto dembiga towbada kadib oo uu joogteeyo waa arin aad uxun, asalna waxaa ah in sheyga hadii allaah dartiis looga towbokeeno in aan mardambe lagu laabanin, balse Weydhicikartaa in sheydaan kugu riixo, hadiise dhacdo in shey aad katowbo keentay aad dib ugu laabato waa in aad noqotaa sida ninkii rasuulka kasheekeynayay ee markasta oo dembi uu kudhaco lahaa yaa rabbi dembi ayaan kudhacay si uu allaah uu adigane kuudhaho adoonkeygii dembi ayuu kudhacay waxuuna xasuustay in uu leeyahay rabbi raxiim ah oo udhaafo dembiga sidokalena uqabto oo kuciqaabikaro balse waan udhaafay adoonkeyga dembigaas.

Hadii aad isweydiineyso qaabka leysaga dhaafo ama leysaga gooyo dembiyada si aadan ugu laabanin dembigii aad katowbo keentay anigaa kaaga jawaabayo ee bal ogow in dembiga labo yahay mid aad halmar oo geliya kudhacday islajudhiina aad katowbo keentay iyo mid caado kuunoqdo oo aad ka caado kadhigato midka hore inlagatago dhibweyni kumajiro balse dembiga dadka qaar caadada unoqda sida xanta, beenta, dhaarta kaftanka ah, fiirsashada video dembi ah sida filim, hees, iyo kuwa waqtiga lumiya sida ciyaaraha noocyadooda kala duwan, sameynta caado xun oo dhan qaabka loo joojikaro waa dhowr hab inta ugu macquulsana waa hababkaan:

1: hadii aad rabto in aad caado xun iskajoojiso, Horta fikir inta aadan joojin, waxaadna kafekertaa caado fiican oo aad kubedesho booska caadadaan xun, hadii aad iskudeydo in aad caadad xun iskadhaafto booskeediina caado kale oo fiican kubedeliweyso, waxaa dhaceyso in markii lasoo gaaro waqtigii aad sameyjirtay caadada xun in aad soo

xasuusado caadadii xumeyd, taasina kugu riixdo in aad kudhacdo ama kulaabato caadadii xumeyd,  Lakin hadii aad markiiba caado fican aad booskeeda kubedesho waxaa dhacaya in ay maskaxdaada caadadaan wanaagsan  kumashquusho, oo  midii Horane kugu soo

dhicinba, xitaa lacala hadii ay kugusoo dhacdo  markii ay kugusoo dhacdo waad kagaba shalaayneysaa, maxayelay adigoo wanaag kujiro xumaan majeclesaneysid

2: jar ama gooy asbaabta keeneyso in aad dembi caado kadhigato, tusaale hadii ay Xanta caado kuutahay Malaga yaabo in adiga oo geliya aad wax xamado Lakin saaxibo ayaa jira markii aad lasheekeysado aad wax isla xamadaan, markaa waa in aad iska ilaalidaa in aad waqti badan lajoogto saaxibadaan maadaama ay isla joogista kabadan waqtigii xaajada ay dhalineyso sheeko maalayacni ah kadibna ay dhaleyso in hebel iyo heblaayo beg iyo xabad lagatumo oo aad loo xanto.

3: badi cibaadada oo ay ugu horeyso sadaqada, hadii adiga oo hadda allaah dartiis wax aad jeceshahay ubixisay lagama yaabo in aad islamarkiiba aad kudegdegdo caasintiisa,

4:raadi caadada aad rabto in aad iskagoyso inta uu la egyahay dembigeeda , hadii aad ogaado qadarka dembiga ay ledahay waxaa kuu fudud kadegisteeda, hadii aad ogaado in aad sameyneyso shey aad qabiix u ah oo kabiiro ah waxaa kuufudud in aad ka istaagto oo waxaa lasocodaa Qatarta ay leedahay dembiga kabiirada ah,  hadii uu dembiga yahay mid yar oo saqaa’irta kamidana,  hafiiriinin inuu dembigaagu saqiir yahay ee fiiri in aad allaah caasineyso, allaaha qalbigaaga iyo adiga idindhexteedayo,

Hadii aan towbada intaa kaga baxno aan gudaha ugalno mowduuca cutubkaan oo ah cibaado ficliyo ah ama cibaado fal ama sameyn lalaxiriirinayo taas oo cagsi ku ah midii aan kaga soo hadalnay labadii cutub ee hore, xadiiska 1aad ee cutubkan waa:

1: عن سعيد الخدري رضي الله عنه قال: سمعت النبي صلى الله عليه وسلم يقول: (من صام يوما في سبيل الله بعد الله وجهه عن النار سبعين خريفا)

Xadiiskana waxa uu tilmaamayaa in uu nabigu yiri: qofkii allaah dartiis usoomo maalin allaah waxa uu kafogeeyaa wejigiisa naarta 70 sano.

Xadiiskan faahfaahin marabo oo wuu cadyahay, balanqaadkaasina wuu fulayaa oo uu nabiga sheegay, oo nabiga waxyi allaah usoo waxyooday ama hadal uu allaah usoo sheegay uun buu kuhadlaa,

Waxweyna maaha in aad hal maalin canjeerada allaah dartiis uga dagtid, sidokale waa sharaf in aad baahado adigoo allaah raxmdiisa raadinayo kamagangelayana cadaabkiisa, baahida aad dareemeysana allaah wuu ogyahay kamana qarsoona balse waxuu kugu abaal Marin doonaa wax aysan indhaha waligood arag, dhegahana aysan waligood maqal, qalbigana waligiis kusoo dhicin oo ah janada iyo waxa kudiyaarsan.

Hal maalin soomid lasoomo waaye sida uu xadiiska tilmaamayo maalinkii aad rabto kadhigo, Lakin waxaa kuu wanaagsan in aad kadhigado maalmihii uu nabiga soomi jiray ee ah isniinta iyo khamiista midkii aad rabto, hadii aad isniin kadhigato maalintaas ama qamiis waa kuu fiicantahay, laakiin maalmaha kale xitaa waa kadhigakartaa sida arbaco iyo talaado iyo sabti.

**2:عن أم حبيبة زوج النبي صلى الله عليه وسلم أنها قالت:**
**سمعت رسول الله صلى الله عليه وسلم يقول: ما من عبد مسلم**
**يصلي لله كل يوم اثنتي عشرة ركعة تطوعا غير فريضة إلا بنى الله له بيتا**

Umu xabiiba[6] waxay leedahay nabiga waxuu yiri: qof adoon ah oo muslima majiro oo allaah dartiis udukanaya 12 rakcadood oo suno ah oo waajib aheynin ilaa haduu jiro qof dukanayo 12daas rakcadood Allah waxuu janada uga dhisayaa guri,
Xadiiskan waxuu leeyahay qofkii dukado 12rakcadood oo suno ah allaah janada ayuu guri uga dhisayaa, 12daas rakcad waxaa loolajeedaa sunooyinka loo yaqaano rawaatibta, oo riwaayad kale ayaa cadeyneysa Macnaha Xadiiska oo
tilmaameyso in laga wado rawaatibta, hadii aan sharaxo rawaatibta waa sunooyin 12 rakcad ah oo salaadaha waajibka ah qaarkood kahormara marna kadibmara

[6]umu xabiiba waa xaas kamida xaasaska nabiga scw magaceedu waa Ramlah bintu abii sufyaan waa iyadu saxaabiyad aahabeedna waa saxaabi, hooyadeedna waa saxaabiyad oo waxaa ladhahaa hinta Bintu cutbah, walaalaheedna waa saxaabo, oo waxaa kamida aas-aasaha dowladii umuwiyiinta ee mucaawiye bin abii sufyaan, xaaskeedana waa ka aadame oo dhan ugu sharfta badan(nabiga). Waxay kamid aheyd saxaabada kasoo haajiray dhibkii qureesh ee usoo hijrooday ardu xabash ama itoobiya waxaa lasocday ninkeedii hore ee cubeydulaahi binu jaxshe, oo kudhintay ardu xabash, laakiin ayada wey laabatay, waxay kunoqotay makka, hadane Makko wey kasii haajirtay oo madiino ayay aaday, kadibna nabiga ayaa guursaday sababtoo ah garoob ayay aheyd oo ninkeeda waa kii kudhintay hijradii ardu xabash, allaah karaali noqdee hooyo ramalah oo kucaan ah magaca umu xabiiba waxay dhimatay sanadkii 44Hijriga.

qaabka ay ku imaanayaana waa kan: 2rakcadood oo kahoreyso salaada subax(aadanka kadib aqinkana kahor), 4 rakcad oo kahoreyso salaada duhur(aadaanka kadib aqinkana kahor), 2kadambeyso duhurka, 2rakcadood oo maqrib kadib ah, 2rakcadood cishe kadib ah, waa kuwaas  saladaha xadiiska tilmaamayo, waxay soo galaan waxyarkahor salaadaha waajibka ah qaarkood iyo kuwa kadibmara sida qoraalka kamuuqado oo lala imaanayo  islamarkii latukado oo la duceysto ayaa lagu xijinayaa. Si fudud jedwalkaan raac:

| ***Kahor*** | Salaada | Kadib |
|---|---|---|
| 2 | Subax | ___ |
| 4 | ***Duhur*** | 2 |
| _______ | Maqrib | 2 |
| ________ | Cishe | 2 |

Meesha aan dhigay calaamada ah —- waxaa loo lajeeda waa eber oo wax raatibo ah oo kujiro malahan.

Waa sidaas ogow salaada casar wax kahoreeyo ama kadambeeyo oo raatibo ah majirto, maqribka waxkahoreeyo malahan, cishe waxka horeeyana malahan, laakiin maqribka iyo cisho min labo rakco ayaa hee kadambeyso.

***<u>Waqtiga ladukanayo rawaatibtaan</u>***

Waxaa muhiim ah in la ogaado xiliga uu soo gelayo  waqtiga rawaatibta iyo xiliga uu dhamaanayo,

Sunooyinka kahoreeyo salaada sida 4ta rakco ee kahoreyso duhurka iyo 2 rakco ee kahoreyso salaada subaxa waxa uu soo geliyaa waqtigooda waqtiga ay soo gasho salaada Lakin ah inta  aan ladukanin, yacni salaada subax markii ay soo gasho waa la adimaa markaas ayaa dukanee 2 rakco ee kahoreyso salaada subax, sidokale duhurka 4ta

rakco ee kahoreyso waxaa dukanee markii uu soo galo duhurka ee la adimo Lakin aadan weli dukanin salaadda,

sababtoo ah in ay kahoreeyaan dukashada duhurka ayaa larabaa, siodkale kuwa kadambeeyo salaadaha ee larabo in ladukado markii salaada waajibka ah ladukado gadaasheed, ayagana waqtigooda waa markii laga baxo salaada waajibka, waxa uu waqtigooda ku egyahayne markii uu dhamaado salaada ay lasocdeen waqtigooda, tusaale labada racko ee duhurka kadambeyso waxaa dukakartaa ilaa uu kasoo galo waqtiga casarka uuna dhamaado waqtigii duhurka,

**3:قال رسول الله ﷺ: ممَنْ تَوَضَّأَ نَحْوَ وُضُوئِي هَذَا ثُمَّ قَامَ فَرَكَعَ رَكْعَتَيْنِ لَا يُحَدِّثُ فِيهِمَا نَفْسَهُ غُفِرَ لَهُ مَا تَقَدَّمَ مِنْ ذَنْبِه**

Xadiiskan asagana waxa uu tilmaamayaa in nabiga uu weyso qaaday, kadibn yiri: qofkii sideydaan oo kale uweysoqaado oo isdaago oo labo rakco oo suno ah dukado naftiisana lasheekeysan inta uu saalada kujiro waxa loo dhaafayaa dembigiisa intii hore martay.

***Macnaha Oo gooban***

Xadiiskan waxa uu tilmaamayaa suno loo yaqaano sunatu waduu’ ama sunada weysa qaadka, waa suno uu qofka dukanayo markii uu soo weyso qaado, sunadaas waa suno abaalmarinteeda la egyahay in dembigaaga oo dhan laguu dhaafo,

Waxa aad dukaneysaa sunadaan markii aad soo weyso qaadato xiligii doonto ha ahaadee xitaa waqtiyada sunooyinka ladukakarin sida casarka dabadii, waxaa jirta 4 waqti oo sunooyinka aan waxsababa laheyn in ladukado aysan banaaneynin in ladukado, 4taas waqti waa:

1:marka ay qoraxda soo baxdo ilaa ay soo gor naqodo xoogaa kudhawaad inta laga gaarayo 6:30 ama laba iyo tobankii iyo bar.

2: watiga ay bartanka samada daagantahay ilaa ay ujanjeersado dhanka midig ama galbeed, yacni waqtiga duhur waxyar kahor ah ayay qoraxda bartanka ama kalabarka samada ku aadantahay, waa waqtiga shey waliba uu hooskiisa dhexgelayo, tusaale hadii aad isdaagdo waxtigaas hooskaaga bari majiro galbeedna majiro ee dhexda ayuu kusoo aruurayaa markaa watigaas lama ogolo suno wax sababa laheyn oo uun leyska dukanayo si ajar badan loo helo,

3:salaada casar kadib ilaa ay qoraxdu kdhacdo

4: marka ay dhacayso oo ay gaduudantahay qoraxda ilaa ay sitoos ah uwada dhacdo, qodobkan number 3 uun buu soo hoos gelayaa.

Ogow waxa ladiidayo waa suno aan sabab laheyn Lakin waa la dukakaraa sunooyinka sababka leh, sida taxiyatul masjidka, ama sunada ladukado marka masjid lagelayo iwm.

Xadiiska waxaa kujirtay in nabiga dhahay qofkii sideydaan uweyso qaado ee labo rakco dukada asagoo naftiisa lasheekeysan dembiigisa waa loo dhaafayaa, maxaa lagawadaa naftiisa lasheekeysan? Nabiga waxuu xadiiskale kudhahay adoonka looma heesto waxa qalbigiisa kusoo dhaco inta uusan sameeynin ama uusan kuhadlin, maxaayeelay sheydaanka waxa uu qaadaa ama maraa xididada halbowlaha ee dhiigga qaada ee wadnaha iskugudba, markaa wey ufudutahay in quluubta dadka uu kusoo rido wax xumaana,

Markaas baa arki adigoo qalbiga xumaan weyn iskadhahaya oo hadii qof maqli lahaa lagaa argaagaxilahaa, ama waxaad arki adigoo dembi weyn qalbiga kaaga jiro oo aan la suureysakarin, waxaas oo dhan sheydaan ayaa usabab ah allena kuuma qabanayo inta aadan kuhadlin ama aadan sameynin.

sidaasdardees kelmada ah naftii lasheekeysan ha ufahmin in laga hadlayo was-waaska uu xiliyada qaar qaluubta dadka sheydaanka kusoo duuro, balse waxaa laga hadlayaa

qof sii raac-raaca was-waaakaas, yacni hadii uu kusoo rido qalbigaaga shey wax xun hasii raac-raacin ee golka uu kugu soo ridaba kadhaqaaji oo usoo laabo khushuuca salaada.

**4:**قال رسول الله صلى الله عليه وسلم: من غدا إلى المسجدِ أو راح ، أعدَّ اللهُ له نُزُلًا من الجنَّةِ كلما غدا أو راح

*Nabiga waxuu yiri qofkii masij ukalaxo/ukalaho/udheelmado, ama ucaraaba waxuu allaah udiyaariyaa booskiisa janada markasta oo uu kalaxo ama uu caraabo.*

***Macnaha oo gooban***

*Horta Ereyga usocodka masjidka ee kalaxaada ama kalahaada ama dheelmashada waa subixii socodka ah, caraabiduna waa galabtii socodka ah, culimadana waxay kufasireen qaarkood sii socod iyo soo socod sidaas daraadeed salaadkasta hadii aad masjidka aado sida kucad xadiiska allaah guri ayuu janada kaaga diyaarinayaa ama siguud boos uu dego,*

*Xadiiskale waxuu sheegayaa in qofka marka uu masjidka usiisocdo uu talaabne dembi dhaaf kahelayo tallaabne darajo sare loogu qaadayo, xadiiskale waxuu ahaa qofkii salaada subax jameeco kudukadaa in allaah uu xafidayo,*

*Xadiiskale waxuu ahaa in qofkii masjidka kudukado salaada subax ee fadhiya ee iskawerdiyo ama quraan iska aqristo ilaa ay qoraxda kasoo baxdo in lamidyahay qof xajiyay oo cumreystay*

Xadiiskale waxuu ahaa in qofka masjidka jooga ama dadka masjidka jooga ee kitaabka alle baranayo ama dad barayo in allaah raxmadiisa dabooleyso, xasilloonina usoo dirayo, malaaiktana ay uducaynayaan,

Markaa siguud ajarka masjidka lama soo goobikaro waa in uun salaadaha lagu ilaaliyo.

Qodobka kale ee kuxiga waa salaatu leylka oo asagane leh ajar badan, waana salaad ladukado mida ugu fadliga badan kadib 5ta salaad ee waajibka ah, salaatu leylka waa

salaad lagu sheegay qur'aanka suuratu musamil dhamaadkeeda iyo horeydeedaba, waa sunno katarjumeyso mu'minimada dhabta ah oo munaafiq lagama yaabo in uu usoo tooso, nabigane umada waa uu ku booriyay, waxa uu nabiga dhahay qofka xiliga uu ugu dhowyahay rabigiis waa saqda dhexe ee habiinkii ee hadaad awoodo dadka waqtigaa alle xusaya in aad kamid noqoto kamid noqo,

**5:قال رسول الله صلى الله عليه وسلم أقرب ما يكون الرب عز وجل من العبد في جوف الليل، فإن استطعت أن تكون ممن يذكر الله في تلك الساعة فك**

*Salaatu leylka waa sunnada ugu ajarka badan uguna qiimaha badan, waa salaada uu qalbiga ugu xasiloonida badan yahay, qofkana ugu khushuuca badanyahay,*

*waa salaada ay xitaa dadkii hore dukajireen, yacni umadihii naga horeeyay, waxaana kutusaya xadiiska uu nabiga yiri isdaagid habeenkii salaad loo isdaago waxaa ugu qeyr badan midkii nabi daa'uud kadib buu sii sharaxay qaabkii uu ahaa qiyaamu leylkii nabi daa'uud, meeshaas waxaa laga fahmi in salaadu leylka qiimihiisa iyo ajarkiisa xitaa ay umadihii hore ku baraarugsanaayeen oo allaah u sharciyeeyay.*

*Salaatu leylka hadii aadan hore udukajirin waxaa haboon in aad dhowr arimood sameyso si uu caado kuugu noqdo, maraxaladihiisana aad kabilowdo mida ugu hooseyso hadii aad kabilowdo mida ugu sareyso laba habeen kadib waad caajisi, laakiin mida ugu hooseyso hadii aad kabilowdo ilaa aad gaarto mida ugu sareeyso caado ayuu kuu noqo* doonaa ay naftaada laqabsado, si guud waqtiga salaadu leylka waxa uu bilowdaa salaada cishe kadib waxa uuna dhamaadaa waqtiga fajarka dhasho ee aadaank dambe ee saxuurta lagu joojiyo, yacni xiliga soonkii waqtigii saxuurta laga isdaagi jiray uun buu dhamaanayaa,

Marxaladaha larabo qofka aan dukajirin salaatu leylka inuu maro waa ilaa 4 marxalad, si uu uga caado dhigto salaatu leylka, marxalada ugu dambeyso ayaana ah mida ugu fiican ee nabigu sameyjiray, laakiin hadii aan iskudayno in aan marxaladaas ayada ah kabilowno labo habeen kadib waanu caajisi oo waxaa nagu rumoobeyso maah-maahdii aheyd laafyo loo dhalan 5 talaabo madhaafto, hada si uu kuugu caado noqdo qiyaamu leylka dhowrkan tallaabo usoo mar si aad uga caado dhigato salaadaan, marxaladahani waa ilaa 4 marxalad waxaa lagaaga baahanyahay mida 1aad markii ay caado kuunoqoto usoo gudub midda 2aad kadibna mida 3aad ilaa mida 4aad katimaado, waqtigii aad istiraahdo caado

weykuu noqotay marxaladaan kadib usoo gudub midakuxigta ogowna degdeg yuuna kuqaadin oo waqtiga shey looga caado dhigakaro qiyaas ahaan kama yaro 10 maalin markii aad marxalada 1aad ugu yaraan 10 maalin sitoosa ugu ceceliso kadib usoo gudub mida 2aad, ayadana 10 habeen markaa sameyso waxay udhowtahay iney caado kuu noqoto ee usoo gudub midda 3aad sidaas kuwad ilaa marxaladda 4aad kagaardo.

marxadahaasina waa:

1: in salaada cishe kadiba aad dukado salaadu leylkii inta aad awoodo oo aanad iska badinin kadibna aad witriga raacsiiso, witriga waa salaad gensi ama gesi ah sida 1racko ama 3racko ama 5rakco lagu soo gunaanado salaatu leylka…., kidbna aad iska seexado oo salaada subax uun usoo toosto.

Markii qodobka 1aad caado kuu noqdo usoo gudubka marxaladaan labaad,

2:in aad salaada cishe kadib aad dukado intii ragco oo kuu fudud kadibna aadan kuxijinin witriga ee aad dib udhigato oo marka aad seexa rabto uun witrido.

Markii qodobkaas caado kuu noqdo usoo gudub qodobkaan 3aad;

3; in cishaha oo geliya uun dukado deedna salaadu leylka iyo witrigaba aad dib udhigto, adiga oo soo toosaya salaad subax waxyar kahor oo rakcado fudud inta aad dukado kadibna aad witirkii latimaado, kadibna toos usoo jeedo maadaama salaad subax waxyar kaharsantahay, kadibna Aad dukado salaada subax, kadibna howl maalmeedkaada sii qabsado.

4: qodobkan waa qodobka hadafka uu yahay uguna adag, markii lala qabsadana fudeyd noqonaya, waana qodobka ugu fadliga badan, waana qiyaamu leylkii nabiga uu sameeyjiray iyo kii uu nabi daa'uud sameyjiray,

*waana qodobka ay usoo gogol-xaarayeen ama horudhaca u ahaayeen 3dii qodob ee hore.*

*Marka lala imaanayo qaabka loo la imaanayo waa kan:*

*Cishaha iskaduko waqti hore seexo kadibna Waa In aad soo toosto habeenkii 3 markii loo qeybiyo dhigga ugu dambeeyo, yacni saacada habeenka ayaa saddex uqeybin deedna labada dhig  ee hore waad hurdi dhigga ama qeybta ugu dambeysana waa dukaneysaa salaadu leylkii, tusaale halkan soomaliya habeenkeeda inta ugu badan 12saac, markaa 12daas saac uqeybi 3, kadibna 3taas 2kamida hurud kadibna halka dhig ee soo haro duko, tusaalaha oo dhameystiran waa kan: habeenkii oo 12 saac ah uqeybi 3, hagaag 12÷3=4, jawaabta noo soobaxday waa 4 markaa 4ta saac ee ugu dambeyso ee 8saac kabilabato soo tooseynaa ama 9saax hadba saacada uu fajarka dhasho iyadoo loo fiirinayo xoogaa markii aad dukado ayaa dib ugu naqsaneysaa hurdadii, kadibna salaada subax uun baad usoo toosi,*
*Waa kaas slaatu leylkii nabiga Ahna marxalada ugu dambeyso uguna adag uguna ajarka badan,*
*Balse waxyar oo in aadan fahmin laga yaabo ayaa kujira marxaladaan Oo ah in markii aad 8 saac soo toosto habeenkii ee aad dukado salaadu leylkii aad dib ugu laabaneyso hurdadii adigoo hurdayo inta udhaxeyso salaadu leylkaagii ilaa salaadda subax kadhalato.*
*Balse Waa maxay xikamada kujirto in markii ladukado salaatu leylka in  dib loogu noqdo huradada?*

*Xikmada kujirtaa waa in aad kadhigtaa soo toosidda aad soo toostay mid aad uga gonleedahay salaatu leyl oo geli ah, maxaa yeelay qodobkii kan kahoreey ee 3aad waxa aad soo tooseysay adiga oo salaada subax toos udukanayo oo hurdo yar galeynin sidokale nolol maalmeedkaagiina sii bilaabanaya,*

*Lakin hurdada yarta ah ee aad gashay waxay kuu dareesay ikhlaas iyo ajar gooni ah kaas oo ah in aad usoo toostay salaadu leyl oo geli ah, oo wax dankale usoo toosin oo aan ka aheyn in aad hor istaagdo rabigaa kadibna aad iskaseexaday markii aad dantaadii gaartay ee aheyd in allaah hor istaagtay. Marka huradada yarta ah sirtaas ayaa kujirta.*

*Sidokale soo toosida habeenkii marka 3 loo qeybiyo qeybta dambe waxaa kujiro sirkale iyo fadli tirobadan, oo waa xilli allaah subxaanahu watacaalaa uu usoo degayo samaa'udunyaa(samada aduunyada) maxaayelay waxaa jira 7 samo, 7daas samo waxaa kasii koreeyo carshiga, carshigaas ayuuna allaah kasii sareeyaa, markii lagaaro habeenkii 3 qeyb qeybta u dambeyso ayuu allaah subxaanahu watacaalaa usoo degayaa samada*

*aduunyada kadibna dhahayaa waryaa ibaryaya oo ka aqbalaa, yaa wax iweydiisanaya oo siiyaa, yaa iga dembi dhaaf talbanaya oo aan udambi dhaafaa,*

*hadalkaas aniga madhahayo oo nabiga ayaa dhahay xadiiska tilmaamayana waa kan;*

**وقال رسول الله صلى الله عليه وسلم قال: ينزل ربنا تبارك وتعالى كل ليلة إلى سماء الدنيا حين يبقى ثلث الليل الآخر فيقول: من يدعوني فأستجيب له، من يسألني فأعطيه، من يستغفرني فأغفر له.**

*Xadiiskan Macnihiisa waa: nabiga waxuu dhahay: allaah ayaa usoo degayo samada aduunyada marka ay soo hard habeenkii marka 3 loo qeybiyo qeybta dambe, markaa ayuu leeyahay yaa ibaryayo oo ka ajiibaa? Yaa wax iweydiisanaya oo siiyaa? Yaa iga dembi dhaaf talbanaya oo aan udambi dhaafaa, xiligaas hadii aad soo toosto oo aad tiraahdo rabiyow waxaas isii shaki kumajiro waad heli doontaa, sababtoo Ah allaah ayaa xiligaas dhahayo waryaa wax iweydiisanaya oo aan siiyaa, hadii aad tiraahdo halmar oo xilligaan ah astaqfirulaah waa laguu dembi dhaafayaa, oo allaah ayaa dhahaya waryaa dembi dhaaf iweydiisanaya oo aan udembi dhaafaa? Markaa salaadu leylka ajar badan ayuu leeyahay, waana salaada ugu ajarka badan kadib 5ta salaad ee waajibka ah, Nabigagana muhiimadeeda waa uu inagu baraarujiyay asagoo dhahay:*

**وقال صلى الله عليه وسلم: أيها الناس، أفشوا السلام، وأطعموا الطعام، وصلوا والناس نيام، تدخلوا الجنة بسلا**

*Oo ah dadow salaanta faafiya, dadka baahana cunto siiya, dukadana dadka oo hurdaya janada ayaad galeysaane.*

*Sidokale nabiga aad ayuu ugu dadaali jiray salaatu leylka ilaa suu udaagnaa ay lugihiisa dhib soo gaaray ama ay dildilaaceen.*

**قالت عائشة ـ رضي الله عنها: كان النبي صلى الله علية وسلم يقوم من الليل حتى تتفطر قدماه، فقلت له: لم تصنع هذا يا رسول الله وقد غفر لك ما تقدم من ذنبك وما تأخر؟ قال: أفلا أكون عبدا شكورا. متفق عليه.**

*Caashi[7] waxay leedahay nabiga mid salaad u isdaago ayuu ahaa habeenkii ilaa ay labadiisa lugood(cagaha) ka jeexjeexmeen markaa Baan ku dhahay: maxaad sidaan usameyneysaa rasuulkii allaw adiga oo allaah kuu dhaafay dembigaaga kii hore iyo kan dambe, markaa buu kudhahay miyaan ahaaneynin adoon mahadnaqo.*

*Nabiga aad buu ugu dheeraaday salaadda habeenkii ah ilaa ay cirbaha ama lugta qeybta dambe oo hadii inbadan lagu isdaagnaado ama lagu socdo dil-dilaacmo Ay ka dil-dilaacmeen, markii ay caaisho sababta weydiisay asagoo dembigiisa kiisa hore iyo midkiisa dambaba ladhaafay uu sidan ugu dedaalayo salaatu leylka, nabigana scw waxuu dhahay adoon kalaadaas loo galay kamahad naqaya ayaan ahay.*

*Markaa salaadu leylka waa fadli socdo oo guuraya waa sifaatka dadka wanaagsan oo quraanka marka Uu xisaabinayo dadka wanaagsan waxuu kutilmaamaa iney ahaayeen kuwo usoo tooso salaatu leylka oo allaah Waxuu dhahay:* كانوا قليلا من الليل ما يهجعون
Oo Waxay ahaayeen kuwa habiinkii inyar seexa jiray intakalena salaatu leylka dukajiray.

---

***[7]caashio waa xaaska ugu caansan xaasaska nabiga, qofka baadiyaha Kunool ee wacdiga kafog iyo muxaadarooyinka, kitaabana aqrisan hadaa kutiraahdo caaisho waa tuma? waxuu kuleeyahay waa xaaskii nabiga, caruurta yaryar ee magaalada hadaa weydiiso caaisho waa tuma? Ayagana sida ay ubadanyihiin wey garanayaan, magaceeda waa caaisha bintu abii bakar asadiiq, ayadu waa ahlu jano aabaheyd waa ahlu jano, sida ay tusayaan adilo badan oo kusoo aroorday, inkastoo saxaabada oo dhamiba ay ahlujano yihiin hadane si gaar ah kuwa ayagoo nool janada loogu bishaareey ayay kamidyihiin, caaisho waa xaaska geliya ee nabigu gabadh ahaan uguursaday inta kale gabdho may ahayn,***
***Caaisho wax caruur ah mayna dhalin, axaadiista qaar in aad ku aragto laga yabaa ayadoo ladhahayo umi cabdillaah(hooyadii Cabdulaahi), Cabdulaahi gaasi waa Cabdulaahi bin zubeyr laakiin ayada meyna dhalin oo waxaa dhashay walaashed asmaa, kadibna wey jecleyd wiilkaas habar-yarta utahay, nabiga ayay kutiri xaasaskaada oo dhan kunyo ayay leeyihiin marka aniga laga reebo markaas buu kuyiri kunyadaadu waa umu-cabdillaahi, Cabdulaahi habar-yar ayay utahay habar-yartuna waa hooyo, caaisho waa saxaabiyad weyn oo ugu fadliga badan xaasaska nabiga, waxay ahayed aqoon yahanad cilmiga lagaqaado, oo waxay nabiga kawarisay 2210 xadiis(laba kun iyo laba boqol iyo toban xadiis) waxay kamidahay saxaabada axaadiista ugu badan kasoo weriyay nabiga, waana haweeneyda geliya ee intaas oo xadiis nabiga kgawarisay, majirto haweeneyd tiradaan oo axaadiis ah nabiga kawerisay, waxaa ugu soo dhow umu salamah oo kawerisay 375 xadiis, xitaa haweenka kale ee saxaabiyaadka ah hadii leysku soo dardaro dhamaantood inta xadiis ay wariyeen magaarayaan inta ay caaisho werisay, waxaa halkaa kadareemi iney ahwyd hooyo caaisho aqoontii oo Dad ah, waxay dhalatay nabiga markii nabi laga dhigay 5sano kadib, waxayna dhimatay sanadkii 58aad ee hijriga***

***Cutubka 4aad: qodobo muhiim ah***

Cutubkan waa cutubka ugu dambeeya marka loo fiiriyo buugga, waxaan uga hadli doonaa dhowr qodob oo aan kusoo gebagabay doono buugga, qodobadaas oo aan muhiim u arkay, waxii kaa anfaco ka qaado, intii aad ka awoodana samey maadaama aanu nahay insaan aad udabaryar allaahna uusan nagu adoonsanin ama qoorta noo sudhin waxkabaxsan awoodanada, qodobaas waxaa kujira kuwo aan sameyno Lakin ubaahan dul isdaag si aan ugu gabano waxii naga dhiman, sheyga hadii latafatirin oo suu yahay loola imaan waxaa dhacda in adiga oo umaleeyo in sameynaya hadana ay dhacdo in uusan kaa ansaxmin(allaah kagamangalnay).

Qodobka ugu horeeyo ee aan baraarujinayo dadka buuggan aqriyay ee soo gaaray cutubkaan ugu dambeeyo waa:

***Kuxasilidda salaada***

Kuxasilidda salaada waa qodob baraarujin ubaahan inta badana nagu dhaafo degdeg, dhibtase waa in ay halisgelineyso salaadeena gebi ahaanba.

tusaale waxaa kuugu filan in uu nabiga sheegay nin dukanaya 60 sano hadane aan laga aqbalin, sababtana nabiga waa sheegay, oo waxuu yiri salaada kumuusan xasilijirin, haduu qeybteeda kuxasilana qeybta kale kumii xasilijirin, nabiga waxuu yiri laga yaabaa in uu ku dhameystirijiray rakuucda laakiin uusan dhameystiri jirin sajuuda, markaa ninkaas 60 sano ayuu sidaa kudukanayay Lakin lagama aqbalin, asagana maadaama uu salaadii la imaanayay hadane si tafatiran muusan ula imaanin, anaga soomaali ahaan aafadaan degdega ah ee salaada lagu xasileynin waa ay Ina heysadaa, allaah ayaanse gamangeleynaa sida ninkaas oo kale inaan noqono, xitaa waayeelkanada maarka aad aragto marka ay masjid kudukanayaan qaargood aad ayuu uga muuqdaa qaladkaan shabaabkana ha sheegin, marka sajuuda dhulka ladhigayo madhaheysid kelmad ayuu sheegay se waakana asagiiba kala soo booday wajigii dhulka, sunnoba ha ahaadeen kelimaadka la aqriyo sajuuda iyo rakuucda dhanka mad-habkeena shaaficiga Lakin ogow xasilida sunno maahan, oo waa rukni, markaa in aad xasisho waa lagama maarmaan.

Markaa waxaan kutali lahaa waqtiga yar ee cibaadaadka in aan ilaalino rukni waliba xasilidiisa  waliba xaqiisa siino, xasilida maaha in waqti dheer lagu qaadanayo rukniga aad

kujirto balse waxaa lagaa rabaa oo loola jeedaa in aad si sax ah oo dhameystiran uun ula timaado rukniga aad kujirto,

Hadii qofka lagu dhaho kuxasil salaadda, hadane aan loo sharixin qaabka loogu xasilayo salaadda laga yaabee in dadka qaar ay ufasirdaan qaab culus oo ah in salaada kudhawaad 30 daqiiqo lagujiro ayagoo dantii ay lahaayeen saa'id uga habsaamayo , oo ay salaadii isku dheereeyaan ayagoo aaminsan in qaabkaan oo geliya uga ansaxmeyso taasina waa qalad oo diinta inbadan waxay kadigtay quluwiga, qofka sidaa aaminsan hadii uu imaan noqdana oo dadka tujiyo umaddii ayuu salaadda kudheereeynayaa, nabigana aad ayuu udiiday arinkaas, nabiga waxuu dhahay qofka imaamka ah salaada dadka ha u fudeediyo waxaa laga yaabaa in qof waayeel ah gadaashiisa kutukanayo, ama qof dan leh, sidokale marbaa nabiga saxaabi uyimid dhahayo nabigii allow masjidka waan iska daayay oo hebel ayaa salaada nagu dheereeyo markaa buu yiri nabiga kelmad aad ucanaan badan oo ah waxaa idinku jiro dad diinta dadka kaceyrinaya ama ka cayrinaya.

Markaa waa in aan xasilida saalada oo sax ah la imaano anagoo ku xadgudbeynin kana gaabineynin, balse aan ula imaano wejiga saxda ah ee ladoonayo.

Markaa xasilida salaadu waa uun in rukniga aad ulatimaado si caadi ah, tusaale faataxada marka aad aqrineyso haboobsiin boobsiin saa'id ah ilaa aad xaraf inta aad kudhawaaqdo markiiba kasii boodo adiga oo si sax ah Wali ugu dhawaaqin oo aad usii boodo xarafka kuxiga, taasi waa qalad waxayba keensaneysaa in aad adiga xitaa daasho sida aad isaga daba ordeyso oo marna rakuuc ugusii ordi marna sajuud,

Markaa sidaas kaqafiifi, xitaa hadii aad meel usocodo ama dankale kuheysado maaha in aad xowli intaa la eg aad gaarsiiso, sida saxda ahna waa in salaada raaxo lagu dareemo, oo kuleel iyo dhib lamoodin, nabiga waxa uu dhihijray salaada Ayaa laga yeelay indho doogsigeyga, sidokalena waxuu dhihijiray:

أرحنا بها يابلال

oo ah noogu raaxey salaada yaa bilaal, yacni bilaal waa mu'adamkii nabiga markii waqtiga Salaadda lagaaro ayuuna sidaas dhihijiray.

Muhiimada aan usocdo waa in salaada raaxo lagu dareemo, xasilidana waa in sheyga si dhab ah loo la yimaado yacni faataxada caadi u aqri rakuuc, rakuucdana 3mar dheh waxa

aad dhahdo, xitaa halmar hadii aad tiraahdo waa caadi oo 3da sharti maaha, kadibna sajuud, sidokale  soo fariiso sidoakle kunoqo sidokale, yacni aqrintana saa'id ha uboobsiin hadii aad rabto in aad ciyow gudado salaada waxaa kuufuran in aad faataxada xariiriso adiga oo xaraf waliba si dhab ah ugu dhawaaqayo, oo carabka kusugayo,laakiin in aad xarafka bilowgiisa kudhawaaqdo kadibna kasii boodo taas ayaa ah qaladka weyn, ama in xarafkii adiga oo sugin aad usii baado midkale.

Markaa waxaan kucelcelinayaa in salaada ladhameystiro arkaanteeda, waxaad arki qof ayaa dukanaya marka uu sajuudayo labada lug ayuu sare dhulka oga qaadayaa sida kamuuqado sawirkaan,



halka ay 7da xubnood ee laga sajuudo ay kujiraan faraha lugaha ee sare uqaadayo, taasina waa qalad, sidaas dardeed ayay culimo badan waxay qabaan hadii uu qofka sameeyo sidan kamuuqado sawirka in ay salaadiisa baadil tahay, marka qaladkaas in leyska ilaaliyo waa muhiim, sidokale in boobsiiska salaada laga daayo,

xudeyfe bin yamaan oo ah saxaabigii nabiga sirtiisa ku amaaneysajiray ayaa maalin arkay nin marka uu rakuucda kasoo tooso sii foorarsanaya Oo sajuuda usii dhacaya markiiba, yacni inuu tooso oo horda dhabarkiisa simo oo caadi iskudoosiyo ayaa  larabay sax, laakiin ninkan rakuucda markii uu kasii toosayaba wuu sii sajuudayay asaga oo dhabarkiisa sicaadiya ukalibixin oo isdaagin , markaa ayuu xudeyfe kuyiri imisa sano ayaad sidaan kudukaneysay markaa buu yiri 40 sano, markaa ayuu xudeyfe kuyiri ninkii 40kaas sano maadan dukaneynin, hadii aad dhima laheyd diintaan diin aan ahayn ayaad kudhima laheyd,

Sidaas dardeed ayuu cumar binu khadaab dhahay waxaa laga yaabaa in qofka diinta islaamka uu Ku cireysto asagoo hal ragcad dhameystirin, markaa ayaa lagu yiri sidey kudhici amiirkii mu'miniintow markaa ayuu yiri waxaa dhicikarta in qofka salaada kala nusqaamiyo oo rakuucda dhameystiro Lakin sajuuda dhameystirin.

***Ducada*.**

Qodobka labaad ee aan kahadli doono waa ducada, Qodobkaan asagane waa muhiim, inta badan waanu duceysanaa Lakin manaqaano xiliyada ay ducadu tahay mastajaabo(mid la aqbalo) iyada oo maalmahu iskumid yihiin, allaahna markasta uu ajiibayo ducada adoomadiisa hadane waxaa jirta waqtiyo gooni ah oo nabigu inoo sheegay oo la aqbalo ducada, iyo waxyaabo kaagaalmeynayo ducadaada in la aqbalo intaas aayaa qodobkaan labaad ku lafaguri doonaa insha llaah.

Horta ducada ah in allaah waxlaweydiisto oo laga baryo, umadda oo dhan weysameyjirtay gaal iyo muslimba, laakiin markii lahelo sheygii allaah lagabaryaye ayay kugaladuwanaajireen mushrikiinta iyo muslimiinta, cadeyna waxaa kuu ah aayadaan quraanka ah, allaah waxuu yiri:

فإذا ركبوا في الفلك دعو الله مخلصين له الدين فلمّا نجاهم إلى البرّ إذاهم يشركون.

Aayadaan macnaheeda waa: (markii ay gaalada doon raacaan oo ay badda kudhexsocdaan allaah ayay si ikhlaas leh ubaryayaan, markii uu soo badbaadiyana oo dhulka keeno markaas Ayay ushariig yeelayaan)

Sida aayata tilmaameyso mushrikiinta allaah la caabudayo ulaahyo kale wey ogyihiin in allaah oo geliya waxuderikaro oo shurakada kale waxbo uqabakarin, markaas ayay marka ay safar gelayaan waliba Safarka dhanka badda ah, oo hirarka badda dhinacyada kasoo maro oo ay umaleeyaan in ay halaagsami rabaan ayay allaah si ikhlaas leh ubaryayaan oo dhahayaan rabiyow nabadbaadi, ayagoo iskadhaafayo caabudidii allaah waxkale lala caabudayay, markii allaah ducada ka aqbalo oo dhulka imaadaan ayagoo nabadqabo markaas ayay nimcadii alle kugufrinayaan oo ay dib ugulaabanayaan shirkigoodii,

Laakiin muslimiinta markii uu allaah siiyo waxii ay kabaryeen sida gaaladaas oo kale kumey kufrineynin ee wey kamahadnaqayeen, sidaas dardeed qof allaah baryayo helayo waxii allaah kaberyay majiro ilaa waxuu raacayaa dhaqankii muslimiinta ama dhaqankii gaalada, haduu allaah waxweydiisto oo uu helo waxii allaah kabryay markaase uu

kamahadnaqo waa dhaqankii muslimiinta oo saxaabadii iyo dhamaan dadkii wanaagsanaa ayuu shabahayaa blase markii uu kufarxo inuu helay waxii uu rabay kana mahadnaqi waayo uu kibir iyo islaweyni uu kaqaado waxa uu shabahayaa kufaartii juhaasha aheyd ee carbeed, asaga muslimba ha ahaado balse haduu ku kibro oo uu dembiyada kusameeyo waxii uu shalay baryaye waxuu shabahay kufaaru qureeshtii.

Sidaas daraadeed Ducada muhiim weeye muhiimadeedana waxaa kamida: ugu horeyn waa cibaado ajar laga helayo oo nabiga waxa uu yiri:

الدعاء هو العبادة

oo ah ducada waa cibaado

Marka xigto allaah ayaa kaa raali-noqoya markii aad waxweydiisado halka uu allaah u caroodo dadka aan waxbo weydiisan sida uu rasuulka salallaahu calayhi wasalam yiri:

عن أبي هريرة رضي الله عنه قَالَ: قَالَ رَسُولُ اللهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ: (

إِنَّهُ مَنْ لَمْ يَسْأَلِ اللَّهَ يَغْضَبْ عَلَيْهِ)

Sida xadiiska kucad Nabiga waxuu leeyahay qofkii allaah waxweydiisan allaah wuu ucaroodaa,

Yacni qofka allaah  waxbo weydiisaneyn ee bani'aadamka uun isii ordo markii uu wax ubaahdo, kaas Carada allaah ayaa kudhaceyso sida xadiiska tilmaamayo, hadii aad wax ubaahado allaah katuug, hadii ay yihiin wax uu bani'aadamka awoodo sida lacag iwm, oo qof in aad kaqaadato rabtana horta kahormari weydiisiga allaah maxaayeelay waa kuma midka kaaga qaadikaro qofkan waxa aad karabto? Waa kuma midka asaga siiyay wax aad karabto? Waa kuma midka qalbiigisa jileec kuugelikara si uu kuu siiyo waxa aad karabto? Waa kuma midka kaleexiyaKara qalbigiisa in uu kusiiyo waxa aad rabto?

Sidaas dardeed qofka markasta allaah waxweydiista maaha kan wejigiisa haragga kadhacayo sida midka bani'aadamka u ordo ookale, midka allaah waxweydiisanaya waxaa usii gordheyso heybad iyo alle kuxernaasho, halka ka dadka waxweydiisto uu markasta oo waxweydiisto ay sharaftiisa hoos udhacdo, midka allaah waxuu rabo weydiisto weliba kucelceliyo waxaa jeclaanayo allaah, halka midka dadka waxweydiisanayo ay dadka sii nacayaan haduu kucelceliyana kasiidarayaan neceybka ay uqaadayaan.

Hooyadaa xitaa ha ahaado hadaa maanta lacag weydiisado ama wax uun, hadane beri Kuceliso hadane kusii celecliso shaki Kuma jiro yaynaba kuu muujin e dhibsi weydareemi.

Markasta oo allaah waxweydiisato oo weliba kucelceliso waa markasta uu allaah kujeclaado, sida uu nabiga sheegay, oo nabiga waxuu dhahay:

قال رسول الله صلى الله عليه وسلم :إن الله يحب العبد الملحاح

Nabiga waxuu dhahay allaah wuu jecelyahay adoonka baryada kucelceliyo, ee allaah weydiisiga uu waxweydiisanayo ku celceliyo.

Waxaa laga yaabaa in aad kafekereyso oo allaah maxaan weydiistaa? ileen waxaa dhicikarto In aadan waxbo ubaahneyn hada sida lacag sax?
Laakiin waxa aad kafekertay dhanka aduunyada oo geliya, hadii aadan xiligaan aduunyada aadan wax Saa'id ugu baahantahay jirin bal kawaran dhanka aakhiro?

markaa waxa aad allaah weydiisataa oo aad kucelcelisaa markasta in uu allaah cadaab kaa badbaadiyo, janno kusiiyo, caafimaadka kuusiyaadiyo, qaraabadaada cadaab kadhowro. Musiibooyin aduunka kabadbaadiyo. Ducooyinkaan ayaad kucelcelineysaa.

Dhanka aduunyadana waxa aad ubaahantahay asaga weydiiso, hadii aad helikarto bani'aadam kaa caawikarana raadso, laakiin qofka ugu horeeyo ee aad waxweydiisato ha noqdo allaah, hadii ay dhibkugu dhacdo qofka ugu horeeyo ee maskaxdaada kusoo dhaco hanoqdo allaah, maanta bulshadeena qodobkan in laga dhiso aad ayay ugu baahanyihiin, Sababtuna waa maanta hadii dhib kadhaco deegaan yar oo dalkeena kamida sida fatahaad, colaad,abaar, barakac, waxaad maqli daqiiqadaha ugu horeeyaba ayagoo dhahayo qaramada midoobay hanaga soo gaarto,ama waxaanu baaq utireynaa dowladda mareykanka. Lagama yaabo in allaah si bulsho ahaan ah loo xuso oo laroob doono, balse abaarta markii dhacdo waxaa loo ordayaa ururo ama dowlado, xitaa dhanka ducada bushadeena maanta waxaa kubadan dadka marka ay duco rabaan wadaad ama sheekh u ordo Rabin in asaga kugalsoonaado rabigii oo sitoos ah wax uweydiisto,

Markaa maxaa inoo hagaagaya hadii markii aan aduun ubaahano dowlado iyo ururo ucararno markii duco iyo diin ubaahanana wadaad u Cararno, adiga diinta Baro culimada kabaro, ducooyinka baro kadibna adiga uun duceyso adiga uun quraan akhriso, dhib kumajiro in aad sheekh udagto oo kutiraahdo sheekhow bal iiduceey, laakiin waxaa dhib ah in adiga aad ismoodo in ducadaadaba la aqbaleynin, in xitaa aadan hal maalin ducadaada baroobeynin in allaah kaa aqbalayo iyo inlagaa aqbaleynin,

Hadii aad isaga shakisantahay in ducadaada la aqbaleynin, waxaan kuu sheegi doonaa dhowr waxyaabood oo kaa caawinayo in ducadaada la aqbalo, iyo dhowr shey oo kugu hogaaminayo in lagaa aqbali waayo ducadaada ee isaga fogow,  iyo dhowr waqti oo gooni ah oo uu nabiga sheegay oo dhahay ducada waqtigaas waa la aqbalaa oo lamasoo celiyo. Kadib kudedaal in aad adiga si ikhlaas ah rabigaa ubariso.

Hadaan kuhormaro waxyaabaha kaa saacidayo ama kaa caawinayo in ducadaada la aqabalo waa:

1: in aad ducadaada ku aadiso ama kubeegto  waqtiyada uu nabiga sheegay in ducada la aqbalo, Waqtiyadaas weybadanyihiin gadaal ayaa kasheegi doonaa.

2: in aad kubilowdo istiqfaar hadii aad dimbigashay istiqfaartaas ayaa kaatirtiri doonto, oo adigoo dembi laheyn ayaad allaah waxweydiisanee halkii adigoo dambiile ah waxweydiisa laheyd, kadibna dembigaagii in aad qiratana aad kuxijiso oo katowbo keento, kadibna ducada kahor  nabiga kusali, aakhirkeedana kusalli, maxayelay nabiga waxuu dhahay duco kasta oo nabiga lagu salin waa maxjuubo ama mid la aqbaleynin,

3:in amanta allaah aad kudedaasho ducada horteeda, sida uu nabi ibraahiim sameyay, suuradu shucaraa 5 sifo ayuu sheegay oo kamida nimcooyink alle kadib ayuu kuduceystay 6shey.

4: hadii aad awoodo in ducadaada sadaqo ama weyso ama camal wanaagsan uun kasii hordhigto, si ay kuugu sii gogol-xaarto raali ahaanshaha allaah.

5: in aad xalliso hadii aad waxdulmisay ducada horteeda,

6: xiliga ducada waa in qalbigaagu xaadir ahaadaa, in aad si 100% ah aad u yaqiiniso in allaah aqbalayo ducadaada, hadii aad shaki kaqabto ama umaleeyso in lagaa aqbaleynin

waxay soo dedejikartaa in lagaa aqbalin, oo nabiga waxuu dhahay qofka allaah habaryo asagoo yaqiinsan in laga aqbalayo,

7: in aad duceysado adigoo khushuuc kusugan,
8: in waxa aad kuduceysaneyso ay xalaal ama mubaax yihiin, nabiga waxuu dhahay qofka ducada waa laga aqbalayaa haduusan dembi kuduceysan ama qaraabagoysnimo.
9: in marka aad duceysaneyso aad si hoose uduceysado, sida quranka kusugan ee uu nabi sakariye uduceystay oo kale.
10:in aad xalaasha aad kudedaasho, sida dharkaaga, cuntadaada, cabitaankaaga,
11: in aad marka aad allaah waxweydiisaneyso ay waxweyn ahaadaan nabiga waxuu dhahay قال النبي صلى الله عليه وسلم: إذا تمنى أحدكم فليكثر فإنما يسأل ربه

Macnaha xadiiskaas waa: qofkiin haduu shey hamiyo habadsado maxayelay alle ayuu waxweydiisanayaa. Riwaayad kale waa:وفي لفظ آ خر: إذا سأل أحدكم فليكثر فإنما يسأل ربه. رواه ابن حبان وصححه
Oo ah qofkiin marka uu allaah waxweydiisanayo habadsado maxaayelay alle waaye qofka uu waxweydiisanayo.

Waxaan dib ugu laabanayaa number 1 ama qodobka 1aad ee ugu horeeyo11kaan qodob,

qodobkaasi xoogaa sharaxaad ah ayuu ubaahanyahay, qodobkaasi waxuu leeyahah laasim ama kudedaal waqtiyada ay axaadiistu tilmaamayaan in ducada la aqbalo. Markaa xiliyada ducada la aqbalo hadii aan waxkaaga taabto waxaa kamida:

1:aadaanka iyo aqinka inta udhaxeyso, marka 5ta salaad la addimo balse aqimaada salaada lagaarin waa waqti cajiib ah, xiligaas ducadii lagu duceysto waa la aqbalaa oo hasugin in lagaa aqbali waayo waa hadii ducadaada ay kafogaado in waxyaabaha keenikara in ducadaada la aqbalin oo aan gadaal kasheegi doono, oo nabigane waxuu dhahay:
قال رسول ألدعا لا يرد بين الأذان والإقامة
Nabiga waxa uu xadiiskan kudhahay: ducada aadaanka iyo aqinka udhaxeyso lama celiyo, yacni qofka laguma celiyo oo waa laga aqbalaaa

2:saqda dhexe ee habiinkii iyo 3 uqeybka habiinkii qeybta dambe, xiligaas waa xiliga uu allaah subxaanahu watacaalaa soo degayo, horayna waan usoomarnay xadiiska tilmaamayo, iyo in uu allaah dhahayo yaa ibaryaya oo ka aqbalaa yaa wax iweydiisanaya oo siiyaa.

3:xiliga sajuuda, oo nabiga waxa uu dhahay: أقرب ما يكون العبد من ربه وهو ساجد فأكثروا الدعاء oo ah qofka waqtiga uu rabigiis ugu dhowyahay waa xiliga uu sajuudsanyahay ee ducada badiya xiligaas, markaa xiliyada salaadaha gaar ahaan sunooyinka waa in allaah kubarino sujuuda waxa aan dooneyno,
Oo nabiga ayaa dhahay: adoonka marka uu sajuudsanyahay ayuu allaah ugu dhowyahay ee habadiyo ducada,
4:waqtiga uu diiqa yeero, dooro hadii aad leedahay nasiib ayaad leedahay ee markii uu diiqa yeeraba duceyso, maxaa yeelay nabiga waxa uu dhahay marka uu diiqo yeero waxuu arkay Malag ee allaah weydiista fadligiisa, diiqa ama diigga(neefka lab ee doorada)
5: salaada jimacaha casarka kadib waqtiga ugu dambeeyo inta aysan qoraxda dhicin, nabiga waxa uu yiri jimcaha waxaa kujiryo saacad adoonka loo aqbalayo waxuu kuduceysto culimadana waxay badanaa kutilmaameen waqtiga ugu dambeeyo ee jimcaha casarkeeda kadib.
6:salaadaha aakhirkooda salaamu naqsiga kahor, ayadana nabiga waxuu ruqseeyay in la duceysto, markii aad attaxiyaadka dhameyso oo salaamo naqso rabto waxyar kahor int aadan salaamo naqsanin ayaad kuduceysanee waxii aad rabto , hadii aad carabi taqaan carabiga kuduceysanee, hadii aadan aqoonina culimada waxay yiraahdeen kuduceyso luqada aad daqaano xitaa yeyna carabi ahaanine, salaada markii aad kabaxdana xiligaas suno maaha in laduceysto ee waxaa sunno ah digriga soo arooray sida aqrinta aayatu kursiga, iyo adkaaraha kale, laakiin xiligaas xitaa hadii aad duceysado waxdiidayo majiraan, laakiin dadkeena waxay ubadanyihiin in booskii ducada loogu dalagalay ee ahaa salaamu naqsiga hortiisa iney kasoo raraan oo ay keenaan salaamu naqsiga dabadii, Laakiin sida saxda ah waa in markii ataxiyaadka ladhameeyo ee salaamu naqsiga lagaarin in aad allaah weydiisado waxii aad rabto, laakiin hadii aad salaada kabaxdo duco majirto

ee digri ayaa jira oo quranka alle waxuu kudhahay markii aad salaada kabaxdaan alla xusa balse lamadhihin duceysta bal fiiri aayataan allaah waxuu Leeyahay:

فإذا قضيتم الصلاة فاذكوا الله قياما وقعوداً وعلي جنوبكم .

Oo markii aad salaadda kabaxdaan allaah Xusa,

Markaa xusida allaah lagu qusayo ducooyinka soo arooray salaada dabadeed uunbaad aqrineysaa waadma bixi, laakiin masaajida salaadda kadib ducada laga aqriyo labo qalad ayaa kujira qaabkaas jamaaciga ah ah ee loo duceysanayo iyo ayada oo salaadda kadib duco talabi ah oo soo aroortay aysanjirin oo sunno lalaasimo laga dhigtay. Markaa salaada kadib xiliyada qaar iskaduceyso laakiin sunno hakadhiganin aad maalinkasta sameyso, balse salaamu naqsiga kahor duceyso xiligaas ayuu na amray nabiga in aan duceysano e.

Hadii aadan carabi aqoonin aadne rabto in aad salaamu naqsiga kahor duceysado culimada labo fikir ayay kagalaqabaan oo kala ah.

1: salaada dhexdeeda hadii lagu duceysado duco aan carabi aheyn wey jabee.

2: qolo tiri majabeyso qofkii aan carabiga aqoonin luqadii uu yaqaano hakuduceysto kajabimeyso. Qoladaan ayaa xoog badan anigane ilasaxan.

Laakiin si khilaafka looga baxo kuduceyso carabiga, hadii aadan waxa aad xiligaas ubaahantahay aadan kusheegi kareynin carabina kuduceyso ducooyinka guud ee wanaagga aduun oo dhan rabigaa weydiiso iyo midka aakhiro sida in aae dhahdo:

اللهم آتنا في الدنيا حسنة وفي الآخرة حسنة وقنا عذاب النار

Oo ah rabiyow aduunka waanaagiisa nasii aakhirana wanaageeda nasii cadaabkana naga badbaadi, sheyga aad allaah weydiiso rabtay hadii uu wanaagyahay ducadaas Uunbuu soo dhexgalayaa ee ayada uun kuduceyso inta aadan salaamu naqsan ee salaadda kabixin.

Siguud intaan wey kabadanyihiin waqtiyada ducada la ajiibo ee soo arooray Lakin intaas ayaan isaga gaabsaneynaa.

Waxaana ugudbeynaa qodob muhiim ah oo ah maxaa sababikara in ducadeyda la aqbali waayo?

***Waxyaabaha sababta unoqokara in la aqbali waayo ducada qofka.***

Waxaa kamida sababaha Keena in ducada la aqbalin;

1:in qofka uu xaaraan soo cunay ama dharkiisa xaaraanyahay, ama cibtaankiisa xaaraanyahay, waxaa kutusaya in ducadaas la aqbaleynin xadiiska kusugan arbaciinka, ninkii xaaraanta soo cunay, xaaraanta soo cabay, dharkiisa xaaraanta ahaa, xoolaha xaaraanta ah lagusoo barbaariyay, hadane gacmaha gor udaagay ee alle baryay ee dhahayay yaa allaah yaa allaah nabiga waxuu dhahay see looga aqbalayaa.

2in ; aad kuduceysado  dembi ama qaraabo goysnimo, nabiga waxuu dhahay:

قال رسول الله صلى الله عليه وسلم:لا يزال يستجاب للعبد ما لم يدع بإثم أوقطيعة الرحم

Nabiga waxuu leeyahay adoonka kama suulo in ducada laga aqbalo intuusan dembi kuduceysanin ama qaraabo inuu gooyo,

Sida xadiiska kucad hadii shey dembi ah kuduceysado allaah aqbalimaayo ducadaas, sidoakale hadii aad kuduceysaneyso in aad qaraabo gooyso sida in aad kuduceysado inuu kaafogeeyo, ama aad kuduceysado waxkaafogeynayo qaraabada ayadana la aqbalimaayo, nabiga waxa uu dhahay qofka qaraabada gooyo janno magalo, markaa qaraabada wey ka imaadaan dhanka hooyada iyo aabaha markaa iska ilaali 2dan qodob, qaraabo xariirinta somalida waxay inta badan uyaqaanaan in Taleefan  laga Waco ama la booqdo, laakiin dadka qofkasta iskuxeriirin maaha qof ayaa faqiira qaraabada kamida qaabka xeriirintiisa maaha uun booqosho oo geliya ee waa in la gacan qabto, qof qaraabada kamida ayaa dhibqabsaday, qaabka xeriirintiisa maaha in lasoo arko oo geliya, ee waa in lagarabsiiyo, markaa xeriirintu waa ay noocyo badantahay waxayna kuxerentahay qofka iyo xaaladiisa, iyo qofka xeriirinaya iyo awoodiisa.

3:in aad ducada ku  degdegdo, marka aad duceysaneyso in aad shey kuduceysado, kadibna aad markiiba degdegdo oo tiraahdo waan duceystay maana leyga aqbalin, oraahdaas ayaa sababikarta in ducada la aqbalin, oo nabiga waxuu yiri:

قال رسول الله صلى الله عليه وسلم:يستجاب لأحدكم ما لم يعجل، يقول دعوت فلم يستجيب لي

Nabiga waxuu leeyahay qofka waa laga aqbalaa ducada inta uusan degdegin oo uu dhaho waan duceystay mana leyga aqbalin,

Markaa dedegga meel uu kufiicanyahay ilaa hada Maan arag waa in leyska daayo,

4: in aad sigo'an ama si adag uduceysado, marka aad duceysaneyso waa in aad gooyso ama sidhameystiran allaah uweydiisado, nabiga waa uu diiday in qofka uu yiraahdo ilaahow ii naxariiso hadii aad rabto, ilaahow ii dembi dhaaf hadii aad doonto, waa qalad

sidaas, waxa lagaaga baahanyahay markasta in aad si dhameystiran oo go'an aad allaah uga barido ducada, nabiga waxuu yiri: qofkiin yuuna dhihi ilaahow iidembi dhaaf hadii aad doonto iina naxariiso hadii aad doonto, balse qofka haggooyo ducadiisa,
Intaas waxaa kasuu goobi waxyaabah ducada in la aqbalin sababta unoqokaro allaah ayaanu kamagangalnaye,

***Hadii aad duceysado, sheygii aad kuduceysadayna aadan helin maxaa xal ah?***

Hadii aad shey kuduceysado, ducadaadana ay latimaado asabaabihii keenayay in la aqbalo, sidokalena ay kabadbaado asbaabihii aan soo sheegnay ee dhalinayay in la aqbali waayo, sidaas ay tahayna aadan helin waxii aad kuduceysaday xaggee ayay kabixikartaa ducadaadii? Halka ay kabaxday nabiga ayaa inoo sheegayo ee bal dhageyso, nabiga salallaahu calayhi wasalam waxuu yiri:

عن أبي سعيد الخدري أن النبي صلى الله عليه وسلم قال: ما من مسلم يدعو بدعوة ليس فيها إثم ولا قطيعة رحم إلا أعطاه الله بها إحدى ثلاث: إما أن يعجل له دعوته، وإما أن يدخرها له في الآخرة، وإما أن يصرف عنه من السوء مثلها

Xadiiskan Macnihiisa waa: nabiga waxuu dhahay: qof majiro Muslim ah oo duceysanayo, waxa uu kuduceysanaya aysan kujirin dembi iyo qaraabo gooyid, ilaa haduu jiro qof sidaas ah allaah ducadiisa 3 shey midkamida ayuu kadhigaa:

1: in uu ducadiisa usoo dedejiyo oo aduunka kusiiyo, waxii uu kuduceystayna helo.

2:in uu  Udibdhigo oo keydadka aakhiro ugu daro oo maalinta qiyaame laga ajarsiiyo.

3:in uu dhibaato kusoosocotay kaga leexiyo.

Bal eeg xadiiskaas iyo halka ay dadka markay duceystaan uquusdaan oo ay umaleeyaan in ay Tamar ama energy uun iska qasaariyeen, iyo sida uu nabiga scw unoogu bayaaniyay in marna ducadeena saxiixa ah aysan aheyn mid lagadegayo.

Nabiga waxuu sheegay in 3midkood ay noqoneyso ducada,
Oo kala ah in uu helo waxii uu kuduceystay, iyo in maalinta aakhiro loogu bedelo shey kamuhiimsan, maxaaayeelay cibaado kastaa waa mid aakhiro leyska abaalmarinayo markaa ducadaada in ay kamidnoqoto cibaadooyinka aakhiro leyska abaal marinayo, maxaayeelay ducadu waa cibaado oo horey ayaanu usoo marnay inuu nabigu dhahay: الدعاء هو العبادة oo ah ducadu waa cibaado, markaana ay kamidnoqoto cibaadooyinka abaalmarintooda lagu gudoonsiiyo maalinta qiyaame, culimada qaar baa yiraahdeen shaqsiga ducada badan ayaa ducooyinkiisa qaar loogu dibdhigaa maalinka qiyaame, oo aduunyada lagu siinin, markaa ayuu arkayaa wanaagga ducadii uu aduunka kuduceysajiray qaar aakhiro loogu dib-dhigay oo aduunka lagu siinin, markaa ayuu qofka haminayaa in ducooyinkiisii oo dhan loo dib-dhigo oo aduunka looga aqbalin, markaa xaalka haduu siyaa yahay masuuliyada nasaarina waa in markasta baryida allaah aanu badino,

Qodobka 3aad ee ugu dambeeyo ee nabigu sheegay waa in looga leexiyo dhib kusoo socotay, qofka waxaa jiro musiibooyin kuhabsada oo loo qaray oo larabo in lagu imtixaano, dhibaatooyinkaas qaar ayuu allaah kaaga leexiyanaa ducada iyo baryada aad latimid, 3taas kamabaxdo Ducada lagu duceysto 3dana mid xuni kumajiro, kala dooro ducadaada midka lagaaga dhigayo hadii lagu yiraahdo wanaagooda in aad ku kala wareerto laga yaabaa, maxaayelay in waxii aad dalbatay lagu siiyo waa muhiim, in musiibo kugu soosocotay lagaaga qabtaana waa muhiim, in aakhiro aad kuliibaantana waa muhiim kale, markaa si aa dhamaan 3doodaba uwadahelno waa in aad ducada badsano, si qaarna naloogu keydiyo, qaarne dhibaatooyin nalooga leexiyo, qaarna naloogu siiyo waxii aan rabnay, markastaa ducada badi, hadii ay yihiin, ducooyinka guud sida in aad allaah markasto janno weydiisato, iyo in aad cadaabkiisa kaa badbaadiyo, in uu khaatumo toosan kugu dilo, in uu saalixiinta kugu daro, ducooyinkaas guud badi, sidookale badi ducooyinka gaarka ah sida in aad allaah weydiisado waxyaabaha qaaska ah ee adiga markaa ubaahantahay,

### *Sadaqada*

Qodobka kale ee inoo xiga waa sadaqada, sadaqada waa sababkamida sababaha naarta looga badbaado janada rabina lagu galo, nabigane waxa uu dhahay naarta uga baqo walow ay jeex timireed ay tahay, markaa waxaa dhaboobaysa oraahdii aheyd sadaqo yaraan magasho,

Sadaqada waxay kamidahay cibaadooyinka cajaa'ibta leh, ee labada qofba saameeyaa, bixiyaha iyo qaadahaba, marka loo fiiriyo dhanka dareenka, qofka waxbixinaya marka uu bixiyo shey uu muhiim u arko waxa uu dareemayaa dareen farxadeed Oo lamid ah midka qaadanayo amaba kaweyn, sadaqadu xumaanta iyo wasaqda ay  dadka kureebto danuubta ama dembiyada ayay kameyrtaa,  nabiga ayaa dhahaya sadaqada qaadashadeeda hadii aan ree banii haashim nahay waa naga xaaraam, maxayeelay waa wasaqda dadka, yacni wasaqdii ay dembiyada uyeeshay dadka ayay kameereysaa sida dharka ay biyaha uga meeyraan wasaqda,

Markaa markasta oo wax sadaqeysado waa markasta oo aad sii dhahiranto oo  dembiyada ka dhahiranto,

Saqada waa muhiim gaar ahaan markii ay tahay mid emergency, ama mid degdega, tusaale sida qof baahan oo aad quudiso, baahida waa xaaladaha aan waqti dheer loo adkeysakarin, hal maalin iyo hal habeen oo iskuxigo  hadii aynaan dadkeena soomaaliyeed wax cunin waxay ubadantahah iney dhacaan, maxaayeelay waxay ubadanyihiin Dad rafaat kugor ah, cuntooyinka ay cunaane waa wax aan laga hadlikarin, fadliga alle waxaa ah in ay ubadanyihiin soomaalida ree miyi, cunana raashinka ay dacbadaan, marka laga reebo magaalooyinka oo hadda dadkii ay saa'id usoo galeen kadibna ay cuneen cuntooyin lasoo dhoofiyay oo dhacay,oo xitaa loo quurin xoolaha yuribiyaanka ah,  sababtoo ah hadii ay dadka ameerikaanka ah ay uquuraan xoolahooda raashinkaas dhacay mayna soo dhoofiyeen, maxaayeelay dadka ameerikaanka ah xoolahooda iyo dadka Africa waxaa la qiimo badan xoolahooda, cadeyn waxaa kuugu filan sanadkii imisa ayaa mareykanka ama USA lagu dilaa si  midab-tagoor ahaan ama African ahaan ah, laakiin miyaad aragtay hal neef oo loo dilayo qaabkale sida waa madowyahay?

markaa neefka madow iyo qofka madow yey jecelyihiin qoomkaas nacladu kudhacday, sidaas dardeed masoo dhoofi laheyn cunto yar oo uu ubaahanyahay saca madow ee kunool Newyork(caasimada mareykanka).

Halkaas waxa ila gaartay sadaqada oo ah shey muhiim ah gaar ahaan mida degdega ah sida quudinta dadka baahan, dadkeenana ubadanyihiin amaba ay yihiin dad baahida u adkeysakarin, sababtana ay tahay cuntooyinka iskudheelitirneyn, xitaa yeyna iskudheelitirnaane aysan cunin cuntadii dadkoodii hore ee adkeysiga badnaa cunijireen oo aheyd midii ay dacbadeen, laakiin ay kuqanceen wax kasoo horjeedo caafimadkooda,dhaqankooda, liddi ku ahna asalkooda,

Daruufahaas ayaa keensaday in qofka soomaaliga ah haduu si xariira cunto u moogganaado maalin iyo hebeenkeed in uu noqdo mid baralaato ah, weey jiraan weyna joogaan dad daruufo aad uwaaweyn kujiro una adkeysto Lakin waxaan kahadlayaa sida loo badanyahay iyo dadka magaalada,

Sidaas daraadeed ayay quudinta qofka ama qofka ooman oo lawaraabiyo fadli weyn uleedahay: oo nabiga waxa uu dhahay:

قال رسول الله صلى الله عليه وسلم: [ أفضل الصدقة سقي الماء ]

Oo ah sadaqo waxaa ugu kheyr badan waraabinta ama biyo siinta,.

Sodkalena siinta cunto ayadana waa min baabil owlaa, ama kasii wanaagsantahay,

, markaa waxsahlan maaha quudinta dadka, soomaalidana waxay tiraa qof baahan gobmaaha, qofka hadii uubaahanyahay hadii uusan iimaankiisa xoogganeyn waxkasta ayaa kasuurooba, sidaas dardeed ayaad arki dad lacag dardeed adoomo u ah oo hadafkooda uu calooshooda yahay, sidokale aad arki gabdho muslimaad ah oo internetka anshax xumo kusameynayo si ay lacag uga helaan, iyo kuwo lacag dardeed usameynaya falal laga naxo Sida dil ama qarax, iyo kuwa diinta uga baxaya lacag dardeed, waxaas waxa sababayana waa uun baahi ay qabaan,

laakiin hal shey oo ay ogyihiin hadii ay sidhaba u aaminsanaa lahaayeen mayna kudhaceen dhibkaan, sheygaasi waa qadarka allaah, hadii aad weydiiso dadka dembiyada usameynaya lacag dardeed,ma heleysaa waxkabaxsan waxa uu allaah kuu qoray? waxuu kuleeyahay maya, laakiin taasi waa ogyahay laakiin si dhaba Uma yaqiinsano,

sababtoo ah hadii ay kuu qorantahay lacagtaas dadka oo dhan hadii ay ukulmaan iney kaa leexiyaan kaama leexiyikaraan, hadii aysan uqorneyna hadii ay dadka oo dhan ukulmaan sidii uu uheli lahaa mahelayo,

sidaas dardeed cimrigaaga inta aad nooshahay gaari meysid waxa uu allaah kuuqoray waxkabaxsan, sidaas dardeed sheygii allaah kuu qoray uun hadaa heleyso ma waxaa wanaagsan in aad xalaal ku qaadato mise xaraan, hadii aad si xalaala uraadsado waad gaari sheygii laguu qoray, sidokale hadii aad waddo kasta oo xun soo marto gaari meysid waxii kuu qornaa waxdhaafsan, laakiin in aad waddo nadiifa kuqaadato iyo in aad waddo xun kuqaadato keebaa laqaatay? Sheyga kuuqoran sug oo ha degdegin waad heliye, waddada aad kuraadsaneysana ha ahaado waddo xalaala,
In aad ka degdegdo wadadii xalaasha aheyd ee waxa kuuqoran si wanaaga kuheli laheyd Haku raadsan waddo xaaraan ah oo Haku helin waxii kuu qornaa qaab dembi ah, adigoo kuqaada karay qaab nadiif ah.

Tusaae Maalin ayaa albaabka waxaa cali bin abii daalib usoo qaraacay nin duugsade ah, ninkii ayaa yiri caliyow wax uun isii, markaas ayuu cali yiri guriga 4 dinaar ama dirham uun baa ku ogahay oo xitaa meel aan dhigay aqoonine isug waan kuusoo raadinaahe, waayahay ayuu dhahay, intii uu cali lacagtii raadinayay ayuu sugiwaayay ninkii duugsadaha ahaa, kadibna waxuu labaxay faraskii cali liijaan ama liijaam (xarig lagu hogaamiyo farask iyo dameeraha marka lawadayo) oo afka ugu jiray ayuu kasiibtay, kadibna wuu baxay, cali markii uu lacagtii xoogaa raadiyay wuu helay, kadibna banaanka ayuu usoo baxay si uu usiiyo ninkii duugsanayay, laakiin maba joogo oo wuu degay, xogaa kadib ayaa waxaa cali uyimid qaadimkiisii oo usheegay in liijaankii faraska uu maqanyahay, wax laraadiyo waa la waa, cali 4tii dirham ayuu udhiibay qaadimkiisii si uu usoo iibiyo liijaan kale, balse markii uu suuqa degay ayuu arkay ninkii duugsanayay ee soo xaday liijaanka oo suuqa Ku iibinaya liijaankii, qaadimkii ninkii ayuu kudhahay imisa ayaad

igasiini liijaankaan, xoogaa markii ay gorgordameen ayay kuheshiiyeen in uu kasiiyo 4 dirham, kadibna qaadimkii cali ayuu usoo laabtay asagoo kudhahaya liijaankii laxaday ayaan suuqa nin iibinaya kusoo arkay kadibna 4 dirham ayaan kasoo sii, cali waxuu kuyiri qaadimkiisii ii tilmaan ninka aad kasoo kaday, wuu utilmaamay cali wuu aqoonsaday in uu ahaa duugsadihii, markaa ayuu cali dhahay wallaahi ninkaasi 4ta dirham xalaal ayuu kuqaada lahaa laakiin wuu degdegay oo waxuu ku qaaday xaaraan.

Qisadaan waxaa laga fahmi in had iyo jeer ay uqorneyd in uu ninkaas helo 4 dirham, laakiin hadii uu kusugnaa lahaa, jidka xalaaasha ahna uu kusii daagnaa lahaa qaab xalaal ah ayuu kuheli lahaa, laakiin wuu degdegay oo uu kaleexday jidkii xalaasha, kadibna xadooyo ayuu galay, kadibna waxii uu xaday ayuu iibiyay kadibna kistii uqorneyd uunbuu kahelay, oo uu si xalaal ah kuqaadakaray, laakiin si xaaraan ah ayuu kuqaaday, waxii uqornaa uunbuuna helay, sidaas oo kale dad uqorantahay in ay hantiile noqdaan ayaa waxa ay hantiilayaal kunoqonayaan qaab dembi iyo xaaraan ah, laakiin xaqiiqdu waxa ay tahay hadii ay waddo xalaal ah kuraadsa lahaayeen hantidaas laba gooroba hantiile way noqo lahaayeen, bals wey degdegayaan ayagoo xal moodaya waddada xaaraanta ah, markaa uun bay waxii uqornaa oo siimberiba heli lahaaayeen kuqaataan qaab dembi weyn ah, laakiin qaabka xalaasha ah ayaa marwalba kafudud qaabka xaaraanta, oo haduu duugsadaha waxyar isxijin lahaa sifudud ayuu kuheli lahaa lacagta, laakiin markii uu qaabka xaaraanta ah maray ee uu xaday liijaanka inta rafaad uu maray bal arag, wuu qaaday liijaanka asagoo cabsanaya, suuqii ayuu ulugeeyay, naadin iyo gorgordan kadib ayuu qaatay intii uu caadi uhelikaray hadii uu waddada xalaasha ah daqiiqado uun kusii sugnaa lahaa.

Markaa sadaqada ayaanu kahadleynaye waa muhiim, marka wax la sadaqeysanayo maaha in ay kadhalaneyso markasta lacag in ay kaabaxdo, xitaa hadalka wanaagsan waa sadaqo sida uu nabiga tilmaamay, ama waxyaabo kale oo lacag kaaga baxeynin oo sadaqo ah ayaa jira waliba ajarweyn kusuganyahay, waxaa kamida waxyaabahaas in aad bisad ama yaan-yuur aad hiliblaha ama gawaanlaha aad uga soo qaado balaq, balaqu waa hilibka cadcad oo yaryar oo dadku uusan cunin, laakiin bisaduhu cunaan, hilibkaas kawaanleyda inta badan waxii bisad ah oo ay arkaan ayay siiyaan intakalena way iskaduurayaan oo dadka macuno, markaa kawaanleyda qaar oo 2 kun shilin siisanaya wey jiraan laakiin inta caadi ubixiso ayaa kabadan, hadii aad subixii udagto oo kutiraa balaq

miyaan helayaa bisad ayaa guriga iijoogto e, waa caadi oo horay ayay kaasiinayaan, xiliga lahelana inta badan waa subixii, hadii aad caado uga dhigto hal bisad oo aad masjidka salaada subax marka aad kasoo baxdaba horay usoo mariheyso kawaanlaha, wallaahi waxa aad qabatay shaqo fiican, oo lacag kubaxaynin, ajar weyna kusuganyahay, naf baahane aad kuquudisay, bisadaasna marka aad geeriyoodo wey kudebidoontaa, waa marka ay xitaa geeridaada dhibkunoqoneyso xayawaanada,

laakiin int aad nooshahay uun kudedaal in aad naf uun kafarxiso ha ahaado Dad ama xoolo.

Ficilkaan waaa ficilka ugu hooseeyo ee qofkasta wax kusadaqeysakaro,
Lakin hadafku maaha in aad meeshaas joogto ee waa in aad kasii badisaa marka aad awoodo,

Laga yaabaa in aad isweydiiso oo bisadu miyaaney xayawaan caadi ah aheyn oo cuntadooda raadsananaya? dadkii ayaaba waxba loo darina xayawaankanina waxay? laakiin waxaa kuleeyahay horta bisada waa tusaale uun oo geliya ee weyjiraan dad mudan in loo dhimriyo, gaar ahaan dalkeena dadka baayan ayaaba saa'idka ah, oo xayawaan maba lasoo xasuusto, , allaah ayaana irsaaqadooda haya oo irsaaqaya sax, laakiin qof ayaa jira awoodin in uu sadaqo siiyo dad, sida ardayda iyo tanyarta oo kale, oo waxbo heysan jecelna iney wax sadaqeystaan, qofkaas oo kale baababka yaryar uun buu asaga kafaaideysan sida quudinta xayawanaadkaas oo kale, oo hadii ladhaqaaliyo janno lagu helayo, hadii la rafaadiyana naar iyo caab lagu mudanayo, oo rasuulka waxuu tilmaamay haweeney bisad lugta kaxirtay, oo hadane ha xirdee maysan quudin, oo waxay u dhimatay basadii baahi, haweeneydii cadaab ayay gashay.

Markaa sadaqadu waa muhiim waliba midda quudinta ah iyo dhamaan nuucyadeeda kaladuwan, iyo Mida ayadana muhiimad weyn leh oo ah sadaqada jaariyada ah sida ceel laqodo, wado ladhiso, masjid ladhiso, geed la talaalo, iwm. Oo ajarkooda soconayo ilaa geeridaada kadib.

Sadaqadaas waaweyn waxaa awoodo dadka waxheysdo, laakiin inta badan dadka waxheysdo wey baqiilaan, ayagoo mooda in sadaqada ay xoolahooda nusqaan

kugeeneyso oo ay kadhimeyso. Laakiin xaqiiqdu waa in ay sadaqada xoolah badiso oo aysan nusqaamin, nabiga waxuu dhahay qofkii waxbixiya oo qof waxsiiyo allaah ayaa asagan waxsiiyo,

Sidokale nabiga waxuu sicad usheegay in sadaqada maalka laga bixiyaa aysan wax nusqaan ah kugeeneyn, oo nabiga waxuu yiri:

وعن أبي هُريرة : أَنَّ رسولَ اللَّهِ ﷺ قَالَ: مَا نَقَصَتْ صَدَقَةٌ مِنْ مَالٍ، وَمَا زَادَ اللَّهُ عَبْدًا بِعَفْوٍ إِلَّا عِزًّا، وَمَا تَوَاضَعَ أَحَدٌ للَّهِ إِلَّا رَفَعَهُ اللَّهُ

Nabiga sida xadiiska kamuuqada waxuu dhahay: saqada maalka waxbo kama nusqaamiso, allaahna adoonka cafiska badan sharaf ayuu usiyaadiyaa, qof allaah iskuduleynaya majiro ilaa sare ayuu uqaadaa,

Sida xadiiska uu tilmaamayo, sadaqada maalka waxbo kama nusqaamiso, yacni rasuulka wuu ogaa in qofka hadii uu boqol dollar uu heysto hadii uu 10 kasadaqeeyo in ay lacagtii qofka nuqsaan kutimid, laakiin waxaa laga wadaa nusqaan macnawi ah oo kuma keento, oo 90ka dollar ee usoo haray ayaa loo barakeeyaa oo boqolkiiba uga wanaagsanaanayo, sidokale lacag kale ama maalkale ayaa soo galaya oo sadaqadii sabab utahay, maxaayeelay sadaqada waxay ugu horeeysaa sababaha uu allaah adoonka ugu furo albaabada risqiga,

Mida labaad ee rasuulka sheegay waa in allaah adoonka wax iskacafiya uu ciso iyo sharaf usiyaadinayo, yacni hadii qof ladulmiyo qofkaas sharaf daro ayay kutahay sax, laakiin dulmigaas ladulmiyay dardeed ayuu haduu iska cafiyo kuheleayaa ciso iyo sharaf xaggga alle kaga timid,

Mida 3aad ee nabiga sheegay waa tawaaduca ama isdhuldhigga, idhuldhiga ama tawaaduca waxa uu uqeyb samaa labo  kala ah in:
In aad marka aad cibaadeysaneyso aad isdhuldhig ama isduleyn kulatimaado cibaadada, tawaaduca waa cagsiga kibirka, siguud dawaatuca waa in aad kibir iska ilaaliso, iyo in aad tawaaduc ama jilcanaan umuujiso  adoomada, markasta oo aad udawaatucdo allaah, adigoo kafogaanaya waxa Carogelinayo sameynayana waxa uu waajibka kaaga dhigay, waa markasta oo aad sharaf iyo darajo sare siiyeelado, sida uu xadiiska

tilmaamayo majiro qof allaah dartiis utawaaducayo ilaa haduu usameeyo tawaaduc allaah dardiis darajo sare ayuu gaarsiiyaa, laakiin halmid kubaraarugsanow oo in tawaaduca iyo isdhuldhigga kaa ahaado allaah dartiis, xitaa aadan usameynin si aad ugaarto darajada sare ee xadiiska tilmaamayo, maxaayeelay hadii aad darajo raadin usameeyso allaah dartiis umaadan sameynin ee dano kale raadis ayuu kaa noqonayaa, sidaas dardeed waa in marwaliba ikhlaaska lagu dedaalo, marwalibana waa in leyska ilaaliyo islaweyni oo ah midii ibliis lumisay, naftaadana ay kulayaraado marna aadan niyada iskadhihin hebel adigaa kafiican, ilaa ay culimada qaar yiraahdeen hadii aan arko qof igaweyn oo gaboobay niyada kama iraahdo adigaa kafiican,oo dhalinyaro ah, balse waxaa niyada kadhahaa qofkaan wanaag iyo cibaado rabi ayuu kaaga hormaray, hadii aan arko cunugyar oo saqiir ahn a isma iraahdo adigaa kafiican balse waxaan nafteyda ugu sheekeyaa in aan uga hormaray xumaanta, dembiga oo uu asaga iga fiicanyahay,

Markaa siguud waa in aan isdhuldhigga badinaa inta aan awoodna dadkana naxariis umuujino inta aan awoodno,

Sadaqada ayaanu kudhexjirnaye Sidokale nabiga waxuu sheegay in subaxkasta labo malag soodegaan oo ay dhahaan rabiyow qofkii waxlabaxo oo sadaqeysto adigane waxsii, midkii haaysto ee waxbo bixina kaheyso oo waxbo hasiin,

Markaa baqiilnimada baqiilnimo uunbey kuusii siyaadisaa, waxbixinta iyo sadaqadan qani-nimo,

Sidokale wajiyo badan ayay daawo utahay sadaqada, sida cudurada oo nabiga waxuu dhahay:

عن أبي أمامة الباهلي رضي الله عنه أن رسول الله صلى الله عليه وآله وسلم قال: ( داووا مرضاكم بالصدقة)

Oo ah bukaanadiina sadaqada kudaweeya.

Cudurka in ay daawo utahay sadaqada waa arin caadiyan la arkay, imisa qiso ayaa maqashay oo kusaabsan sadaqada, imisa qof oo xanuusan oo xoogaa sadaqeystay bay dhaqaatiirtii kudhaheen adinka maaha qofka xanuusan ee inoogu qoran liiska bukaanada, imisa qof oo cuduro waaweyn qabay oo sadaqo intey bixiyeen Ay dhaqaatiirtii kudhaheen labo mid waaye adiga maaheyn qofka xanuusan ee qofkale ayuu ahaa mise cudur maba qabin ee mishiinka laguugu baaray ayaa haleysnaa oo xog qalad ah soo gudbiyay, maxaayeelay meel leydinkama hayo,

Markaa sadaqada waa muhiim, mar uu nabiga dad wanaagsan tilmaamayay waxaa ugu badan ee uu sheegay waa Dad xoolo leh oo sadaqeysanayo xoolahooda, oo qaraabada kuxiriirinaya, halka kuwa ugu xuna uu kutilmaamay qoladaas cagsigeeda, bal xadiiskan. fiiri;

أعن أبي كَبْشَةَ عمرو بن سَعدٍ الأَنْمَارِيِّ : أَنه سمع رسولَ اللَّه ﷺ يَقُولُ: ثَلاثَةٌ أُقْسِمُ عَلَيهِنَّ، وَأُحَدِّثُكُم حَدِيثًا فَاحْفَظُوهُ: مَا نَقَصَ مَالُ عَبدٍ مِن صَدَقَةٍ، وَلا ظُلِمَ عَبْدٌ مَظْلَمَةً صَبَرَ عَلَيهَا إِلَّا زَادَهُ اللَّهُ عِزًّا، وَلا فَتَحَ عَبْدٌ بَابَ مَسأَلَةٍ إِلَّا فَتَحَ اللَّهُ عَلَيْهِ بَابَ فَقْرٍ -أَوْ كَلِمَةً نَحْوَهَا- وَأُحَدِّثُكُم حَدِيثًا فَاحْفَظُوهُ، قَالَ: إِنَّمَا الدُّنْيَا لأَرْبَعَةِ نَفَرٍ:

عَبدٍ رَزَقَه اللَّه مَالًا وَعِلْمًا، فَهُو يَتَّقي فِيهِ رَبَّهُ، وَيَصِلُ فِيهِ رَحِمَهُ، وَيَعْلَمُ للهِ فِيهِ حَقًّا، فَهذَا بِأَفضَلِ المَنازلِ.

وَعَبْدٍ رَزَقَهُ اللَّه عِلْمًا، وَلَمْ يَرْزُقْهُ مَالًا، فَهُوَ صَادِقُ النِّيَّةِ يَقُولُ: لَو أَنَّ لِي مَالًا لَعَمِلْتُ بِعَمَل فُلانٍ، فَهُوَ بنِيَّته، فَأَجْرُهُمَا سَوَاءٌ.

وَعَبْدٍ رَزَقَهُ اللَّهُ مَالًا، وَلَمْ يَرْزُقْهُ عِلْمًا، فهُوَ يَخْبِطُ في مالِهِ بِغَير عِلمٍ، لا يَتَّقي فِيهِ رَبَّهُ، وَلا يَصِلُ فِيهِ رَحِمَهُ، وَلا يَعْلَمُ للهِ فِيهِ حَقًّا، فَهَذَا بِأَخْبَثِ المَنَازِلِ.

وَعَبْدٍ لَمْ يَرْزُقْهُ اللَّه مَالًا وَلا عِلْمًا، فَهُوَ يَقُولُ: لَوْ أَنَّ لِي مَالًا لَعَمِلْتُ فِيهِ بِعَمَل فُلانٍ، فَهُوَ بنِيَّته، فَوِزْرُهُمَا سَوَاءٌ رواه الترمذي وقال: حديثٌ حسنٌ صحيحٌ.

Nabiga waxa uu dhahay: 3shey allaah ayaan kudhaaranayaa iney xaqiiqtahay, waxaana idiinka sheekeynaa xadiis ee xafida,

Saqada maalka waxbo kama nusqaamiso, addoona lama dulmiyo oo kuma sabro dulmigaas ilaa hadii uu kusabro dulmigaas allaah ayaa sharaf usiyaadiyo, addoona mafuro albaabka weydiisiga(duugsi) ilaa allaah ayaa ufuro albaabada faqriga, waxaan idiinka sheekeynayaa xadiis ama sheeko ee xafida: aduunka 4 qof uunbuu usugnaaday, adoon allaah siiyay cilmi iyo maal, oo allaah uga baqaya, oo qaraabadana kuxeriirinaya, oo allaah uqirsan kaladaas, qofkaas darajada ugu sareeyso ayuu joogaa,

Iyo adoon allaah siiyay cilmi laakiin uuna siin maal,oo niyada kajecel inuu waxqabto oo dhahayo:hadii aan maal heysa lahaa sida adoonkii hore ayaan wanaaggaas sameylahaa, niyadiisaas ayuu ajar kuhelayaa oo waxa uu lamidyahay adoonkii koowaad,

Adoon allaah maal siiyay laakiin cilmi siinin, oo maalkiisa kubxinaya cilmidaro, allaahna uga baqeynin, qaraabadana kuxeriirineynin, allaahna uqrisaneyn hantidaas uu siiyay, kaasi waa darajada ugu xun,

Iyo adoon allaah uuna siin cilmi iyo maal midna, laakiin niyada kajecel inuu lamid noqdo qofkii ugu xumaa ee 3aad, asagane niyadiidaas ayuu dembi kuhelayaa oo waxa uu ladembi yahay asaga,

***Sharaxaad yar***

Nabiga waxa uu markii koowaad sheegay 3 arin, markii labaadne 4 arin,

Markii koowaad waxa uu dhahay:

1: maalka sadaqada waxba kama nusqaamiso(horay usoo sharaxnay qodobkaan).

2:qofkii ladumiyo oo iska Sabrana allaah ayaa sharaf siiyo. Waa sax Markasta oo qof kudulmiyo oo aad iskacafiso waa markasta oo aad sharaf siiyeelado, allaah ayaa quluubta dadka heybad kuugu duurayo, sidaas dardeed ayaa tijaabo arinkaan ku ogaakartaa, qof ayaa qalad kaagalay kadibna waad iskacafineysaa, kadibna waxaad arki qofkii oo kaa qajilayo, iyo dadkii oo ixtiraam kuu muujinayo, maxaayeelay allaah ayaa quluubtadooda dadka ugu duurayo heybad iyo sharaf qofka ladulmiyo ee allaah dartiis ucafiyo daalimkii,

3: qdobka 3aad ee nabiga sheegay waa qofkii albaabka weydiisiga furo allaah ayaa kufuri albaabka faqriga, waxa uu nabiga diidayaa duugsiga, duugsina mahaboona intii laga wareegokaro halaga wareegdo, geliya wadada ugu dambeyso hanoqdo, hadii la waayo waddo kale oo xalaala oo waxii aad ubaahneyd kuheliweyso markaa uun dadka waxii ay kugu dheeryihiin weydiiso oo ay awoodaan, hadii kale oo aad waxbadsi uweydiisado allaah ayaa faqri kudabadhigaya, mana dhergeysid waligaa. Midna ogow shaaftada iyo afsoomaaliga dadka wax looga qaadana waa nooc duugsiga kamida, oo duugsiga maaha in aad tiraahdo iikaalmeey oo qura, markaa waxyaabahaas oo dhan faqri iyo baahi kale uun baa laga qaadaa, intii aad kameermeereysakarto kameereyso, laakiin hadii aad waayso wado kale cidii waxkaheleyso uraadso markaa, talaabada ugu dambeyso ha noqdo.

Markii labaadna rasuulka salallaahu calayhi wasalam 4shey ayuu kawaramay, waxuu dhahay aduunka 4 qof uunbaa kusugan ama jooga, bal fiirfiiri dadka aduunka oo dhan 4taas uun waaye, adiga iskabilow midee kusugantahay, 4taasi waa

1: nin cilmi iyo hanti iskuleh, oo allaah uga baqaya cilmigaas maxaayelay dadka cilmigaleh waa dadka ugu alle kacabsiga badan, cilmikasta oo qofka leeyahay haduuna lajirin alle kacabsi Gola uu heysto PHD(shaahadada ugu sareyso ee waxbarasho) laguma tilmaamikaro cilmigaas cilmi naafic ah, qofkaas cilmiga iyo maalkaba leg oo maalkana qarabada kuxiriirinayo oo uu waxkasiinayo qofkii tolka kamida oo ubaahan gacanqabasho,

nimacadaasna alle uqirsan inuu siiyay oo uga mahadnaqa, kaasi booska ama darajada ugu sareyso ayuu joogaa. Yacni aduunka Darajo sare ayuu kajoogaa ilaah agtiisana darajo sare ayuu kuleeyahay, maxaa yeelay cilmigiisiina dadka ayuu baray, maalkiisiina qaraabadii iyo tolkii ayuu waxkasiiyay oo geligii cune muusan noqon.

2:qof cilmi leh, laakiin maal laheyn, oo laakin niyada kajecel inuu maal yeesho si uu qaraabadana ugu xariirayo, wanaagne ugu qabto, sida qofkii hore oo kale, qofkaas niyadiidaas wanaagsan ayuu kuhelayaa ajar, waxa uuna lamidahay asagoo hantidii helay oo kayeelay sidii uu yeelayay qofkii uu kuhaminayay booskiisa.

3:qof maal leh, laakiin cilmi laheyn, oo maalkii si jaahilnimo ah umaamulayo, oo waxuu rabo oo dembi ah isaga sameynayo,maxaayeelay cilmi xumaanta kaceliyo malahan, hadane alle ugama baqayo, oo malaha allaahii shalay kusiiyay  yuuna kaa baabi'in ee kajoog magardo, kaasi waxuu joogaa booska ama darajada ugu xun.

4: qof aan maal iyo cilmi midna laheyn, laakiin kuhaminayo inuu sameeyo waxii uu samyenayay ninkii maalka lahaa laakiin cilmiga laheyn ee xumaanta kubixinayay maalkiisa, waxmaheesto laakiin xumaanta ayuu kuhaminayaa oo laqurxan  kaas asagana waxa uu lamidyahay midka uu kuhaminayo dembigoodana waa iskumid, sidaas ayuu rasuulka salallaahu calayhi wasalam dhahay.

Blase Dadka dunida oo dhan waa 4taas nooc, allaah hanagadhigo midka koowaad hadii kalane midka 2aad, allaahna hanaga badbaadiyo labada dambe, waliba midka sii dambe, oo bulshada aad ugu badan, waxaad arki nin leh wallaahi hadii aan intaas oo ciidana heysan lahaa waa baabi'i lahaa ree hebel oo dhan, laakiin haduuna kelmadaasi katowbo keenin waxa uu lamidnoqonayaa qof sameeyay  oo kale, maxaayeelay niyada mar ayay dembi ama wanaag kuusoojiidaa, sida aan xadiiska kusoo marnay nin aan wax maal ah laheyn ayaa lamid noqonayay sida qof maalkiisa sadaqeysnayo, waxaana ugu wacan

niyad wanaagga, halka uu qof niyeysanayo xumaan waliba kabaa'ir ah kadibna loo qorayo asaga oo sameynin, markaa waa in aan aad uga digdoonaano qaladkaas nagu faafsan, waxaad arki nin ayaa kudayanayo ama jecel hoggaamiye kooxeed qabiilo badan lugta mariyay markaas ayuu leeyahay wallaahi ninkaasi waa fiican yahay, ama waxuu leeyahay wallaahi qabiil hebel lugta ayaan marilahaa laakiin daqiiqadaas Ayuu bad weyn dembi ah dhexdabaashay, sidaas dardeed ayuu nabiga leeyahay qofka hal kelimad Oo uusan umeeldayin markaa ayuu naarta ugu fogaadaa masaafo dhan inta ay iskujiraan bari iyo galbeed ama qoraxsin.

Markaa carabkeena waa in aan xafidnaa, oo nabiga waxuu dhahay labo xubin yaa ii balanqaadayo inuu ilaalinayo oo aan jano ubalanqaadaa, labaas xubin waa afka iyo xubinta taranka, allaah ha inagadhigo kuwii xifdiyo wabillaahi towfiiq, hadii aad halkaan soo gaarday buuggan wuu dhamaaday ee labadaada waalid iyo labadeyda waalid in aad uduceyso kaacodsanaa aniga iyo adigane sidokale in xiligii aqbalaadda ku aado lagayaabaa. Wal-xamduli laah.

halkaan ayaan kusoo goobayaa buugggan, oo aan xoogaa wadooyin badan oo kheyr weyn kusuganyahay kubaraarujinayay dadka,
waxii qalad ah naf iyo sheydaan ayay ka ahaadeen, waxii aan saxayna allaah ayay xaggiisa ka ahaadeen oo iwaafajiyay iyo towfiiqdiisa, waxii qalad ah aad aragto ugusoo wargeli adigoo numberka bogagga ugu horeeyo ee buugga kuqoran igala soo xariiraya,

ugu yaraan iskuday in aad caado kadhigato hal ficil ama hal shey oo wanaagsan oo buuggan kuxusan oo kusoo jiiday, iskuna day in aad joogto kadhigado acmaasha kheyriga ah ee kuxusan buugga inta aad ka awoodo,

Halkaan waxa kudhamaaday buuggii cibaado yar iyo ajar badan caawa oo taariikhdu tahay 26 may 2024, hijrigana 18/11/ 1145.

Waxaan kaa codsanayaa in aad hal qof ugu yaraan aad sii gaarsiiso buuggan ama aad udirto ama aad usoo daabacdo si uu uga faaideysto.